# Degaanka Multnomah
# Qiimeynta Buuxda ee Kooxaha Gaangiska

**Mashruuc iskaashi oo ay dhaqaalihiisa bixiyeen**

**Golaha Isku duba ridka Badbaadada Bulshada ee Degaanka Multnomah**

## Soo Koobidda Maamulka

**Juun 30, 2014-kii**




*Waxaa soo diyaariyay Lore Joplin Consulting*
*www.lorejoplin.com*

# Soo Koobidda Maamulka

Warbixintani waxay soo koobaysaa xog muhiim ah oo la isku keenay oo loogu talagalay *Qiimeynta Buuxda ee Kooxaha Gaangiska ee Degaanka Multnomah,* kaasi oo Janaayo 2014-kii ay bilaabeen Golaha Isku duba ridka Badbaadada Bulshada ee Degaanka Multnomah (LPSCC) Guddigiisa Sare ee Maamulka. Waxaa la soo gabagabeeyay qiimeynta iyadoo la raacayo tusaalooyinka Xafiiska federaalka u qaabilsan Caddaalada Dhallinyarada ee ka Hortagga Dambiyadda (OJJDP), kaasi oo la dejiyay hab saddex waji ka kooban[1] oo loogu talagalay samaynta hab buuxa, oo isku duba ridan si loo yareeyo loogana hortaggo rabshadaha ay sameeyaan kooxaha gaangiska ah. Saddexda weji ee ay hawshu ka kooban tahay waa:

1. Ogaanshaha nooca iyo heerarka dhaqdhaqaaq kooxaha dhallinyarada ee gaangiska ah, sida ay iskugu xiran yihiin dambiyada kooxaha gaangisku, fikraddaha ay bulshadu ka aaminsan yihiin dhallinyarada gaangiska iyo dhaqdhaqaaqa kooxaha gaangiska, iyo adeeg la'aan.
2. Qorshaynta jawaabaha ku habboon.
3. Dhaqan gelinta jawaabahani.

*Ra'yi Ururin ay samaysay Hay'adda Adeegyada Dhallinyarada oo jawaab bixinaya ayaa tiri: "Waxaan u baahanay istaraatajiyad ha kortag iyo waxka qabasho, si wax looga qabto arrimaha la xiriira kooxaha gaangiska ah."*

Warbixintani waxay soo bandhigaysaa dulucdii wejiga hore ee ay hawshu ka koobnayd: ee qeexidda dhibaatooyinka dhallinyarada gaangiska ee bulshada ka dhex jira. Marka dhibaatada iyo waxa sababa iyo waxyaalaha keenaya in ay taasi dhacdo la ogaado, habka ay isticmaalayso OJJDP wuxuu soo jeedinayaa dhaqan gelinta istaraatajiyo aan kaliya laga qayb-gelin dhallinyarada gaangiska ah balse sidoo kale laga qayb-geliyo qoysaskooda iyo hay'adda bulshada kala duwan ee qaybta weyn ka qaata in dadku dhallinyaranimada ka gudbaan noqdaana xubno bulshada ka tirsan oo wax soo saar leh.

*Ra'yi Ururin laga qaaday Waalidka & Qoyska oo jawaab bixinaya ayaa tiri: "In wiilasha Laatiinka ama madowga ay bar-tilmaamaysteen kooxaha gaangisku iyadoo sidoo kalena ayna dugsiga ka helin adeeg fiican."*

Nidaamka dhamaystirka qiimeyntani runtii wuxuu ahaa dadaal ay bulshadu samaysay—kaasii oo ahaa hawl, ilaha kala duwan, iyo xog laga helay hay'addo badan iyo ururada bulshada. Taasi waxaa dheer, in ay wax badan 1,000 xubnaha bulshada ka tirsani ay aragtidooda la qaybsadeen iyadoo la isticmaalayo kooxaha wax u kuurgala, iyadoo la qaaday wareysi fool ka fool ah, iyo ra'yi ururin; inta lagu jiro warbixintani waxaan raacinaynaa hadalo laga soo xigtay dadka jawaabaha bixiyay. Sida uu tala ahaan u soo jeediyay habka OJJDP, waxaan xog ururintayada u dejinay in ay jawaab ka bixiso su'aalo muhiim ah oo la xiriira (1) qaabka ay bulshadu u nooshahay, (2) ciidamada ammaanka, (3) fikraddaha laga aaminsan yahay ardayda, dhaqaalaha dugsiga, iyo xubnaha bulshada ka tirsan, iyo (4) ilaha kala duwan ee bulshada. Waxaan warbixinta u qaabaynay hab isku mid ah.

Intii u muhiimsanayd ayaa halkan lagu soo bandhigay, laakiin sharaxaad buuxda oo ku saabsan habka qiimeynta loo sameeyay iyo si loo fiiriyo xogta la ururiyay, waxaad fiirisaa *Qiimeynta Buuxda ee*

[1] Xarunta Qaranka ee Kooxaha Gaangiska. Habka Buuxa ee Kooxaha Gaangiska ee OJJDP. Oo laga geli karo: http://www.nationalgangcenter.gov/Comprehensive-Gang-Model/About

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Waxbarashadaydii ayaa joogsatay oo la waayay. Waan ka quustay waxbarashada markii aan awooddi waayay in aan ku dheeli-tiro nolasha kooxaha gaangiska iyo lacagta aan waxaan iibino ka helayno ee aan sida aadka ah wakhtigayga ugu hibeeyay."*

*Kooxaha Gaangiska ee Degaanka Multnomah* (Juun 2014-kii). Sidoo kale waxaan kugu dhiire gelinaynaa in aad akhrido "Codadka Dadka ay Saameeyeen Kooxaha Gaangisku" ee ka bilaabma bogga ES18.

# Waxyaalo Muhiimka ah ee la Ogaaday

## Waxyaalaha Muhiimka ah ee la Ogaaday ee la Xiriira Xaddidnaanta Xogta

- Waan awooddi waynay in aan qayb ahaan si buuxda uga jawaabno qaarka mid ah su'aalaha ku saabsan kooxaha gaangiska iyo dhaqdhaqaaqa gaangiska ee ka jira Degaanka Multnomah, sababtoo ah hay'adda badbaadada bulshada oo aan lahayn hab isku xiran oo lagu ogaanayo ama lagula soconayo dhacdooyinka la xiriira kooxaha gaangiska iyo shakhsiyaadka ka tirsan. Su'aalaha ilaa hada aan laga jawaabin waxaa ka mid inta ay tahay tirada shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ah ee ka jira Degaanka Multnomah, iyo tirada kooxaha gaangisku caadiyan ka kooban yihiin marka la is barbar dhigo dhallinyarada iyo dadka waaweyn, nooca dambiyada ay galaan kooxaha gaangisku, iyo goorta ama meesha lagu galay dambiyada kooxaha gaangiska. Marka ay suuragalka tahay waxaan isticmaalnaa tallaabooyin beddel ah si aan jawaab uga bixino kuwo ka mid ah su'aalahani. Anagoo og in aanan awooddin in aan si buuxda uga jawaabno su'aalahani oo ay laftoodu yihiin kuwo muhiim ah, iyadoo la raadinayo sababta aan looga jawaabi karin su'aalahani.

- Baarintaanka xogta ee la xiriira sida ay wax u dhacayaan waxay noqon kartaa mid adag, gaar ahaan sida ay dambiyadu u socdaan. Inkastoo aan ognahay waxyaalaha badan ee dhacayay oo muddo ka dib la soo dersay xogta dambiyada, waa muhiim in la ogaado isbeddelada noocan oo kale ah ee ku imaanaya xogta in ayna kaliya sababi karin isbeddelo ku yimaada tirada sida ay wax u dhacayaan, ee laakiin sababi karaan, isbeddel gaaban oo la xiriira siyaasadda, bixinta dhaqaalaha yo shaqaalaha.

- Waan aqoonsanahay in ay jiraan xaddidaado la xiriirta xogta asalka iyo qowmiyaddaha oo lagaga soo daray Waaxda Tirokoobka Maraykanka iyadoo laakiin macluumaadkaasi la raaciyay halkan si ay u muujiso habka ay dadku kolba meel ugu guuraan. Xaddidaadahani waxaa lagu sharxay *Bulshada Midabyada kale duwan leh ee Degaanka Multnomah: Muuqaal aan Sahlanayn*[2] oo ay ka mid yihiin arrimaha la xiriira sida is-kooxaysiga iyo tirada aan sida fiican loo tirinaynin dadka.

## Waxyaalo Muhiimka ah ee la Ogaaday ee la Xiriira Qaabka Bulshadu u nooshahay iyo Dambiga

- Xogta tirokoobta ayaa tilmaamtay in guud ahaan uu koror ku yimiday heerarka dakhli iyo helidda waxbarasho ee guud ahaan Degaanka Multnomah. Si kastaba ha ahaatee, kororkani si isku mid ah looma qaybin. Waxay inta badan culayska saareen bartamaha Koonfur-bari, Waqooyi-bari, iyo degaanada dhexe ee Koonfur-galbeed Portland.

- Waxaa jira guurid muuqata oo la arki karo oo dadka midabyada kala duwan ka guurayaan Waqooyi ama Waqooyi-bari ee Portland iyagoo u socda xaafaddaha ku yaala Bariga Portland iyo Gresham.

- Guud ahaan, dambiyadda ka jira Degaanka Multnomah hoos ayay u dhaceen sanadihii la soo dhaafay. Hoos u dhacani wuxuu muujinayaa isbeddel ku yimid fal dambiyeedka laga

[2] Curry-Stevens, A., Cross-Hemmer, A., & Isku taga Bulshada Midabyada kala duwan leh (2010). Bulshada Midabyada kale duwan leh ee Degaanka Multnomah: Muuqaal aan Sahlanayn. Portland, OR: Jaamacadda Gobolka Portland

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Dhibaatada kooxaha gaangiska ee ka jira Portland waa waali ay warbaahintu wado. Haa, waa jiraan kooxa gaangiska ka tirsan oo jiraa. Maya, maaha kuwo baahsan oo burburinaya Portland."*

soo bilaabo Waqooyi/Waqooyi-bari Portland ilaa xaafaddaha Koonfur-bari Portland, Bariga Portland, iyo Gresham.

- Xaafaddan la midka ah ayaa si aad ah loo cadaadiyay marka ay noqoto heerka dakhli oo hooseeya, shaqo la'aanta jirta, dadka doorashada isku diiwaan-geliyay oo hooseeya, helidda waxbarasho oo hooseeya, isticmaalka gargaarka dadweyne, iyo ku dhalashada carruurtu ku dhalato miisaan hoose iyo qaadida uurka ee hablaha yar yar.

## Waxyaalo Muhiimka ah ee la Ogaaday ee la Xiriira Dugsiyada

- Heerarka ka tegidda dugsiga oo heerkii u sarreeyay maraya Dugsiyada Degmada Reynolds, kaasi oo la raaciyay xaafaddaha baahida weyni ka jirto.
- Ardayga Maraykanka ah ee Madow ayay u badan tahay in qiyaastii 3.2 jeer dugsiga laga cayriyo marka la barbar dhigo ardayda caddaanka ee ku nool Degaanka Multnomah. Heerka taasi la xiriira wuu kala duwan marka loo eego degmo degmo, laakiin Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Portland ayaa leh heerka qiyaaseed u sarreeya (4.4), taasi oo ay soo raacaan Parkrose (2.9) iyo Reynolds (2.8).

## Waxyaalo Muhiimka ah ee la Ogaaday ee la Xiriira Fikraddaha ay Bulshadu Aaminsan yihiin

- Inta badan shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ah ee la wareystay (83% oo iyaga ka mid ah) waxay tilmaameen in ay jirtay wakhti laga joojiyay ama laga cayriyay dugsiga. Dadka la wareystay, 60% ka mid ah ayaa tilmaamay in sababtu ahayd "iyagoo dagaalamay."
- Ku lug lahaanshaha uu qof ka mid ah qoysku ku lug leeyahay kooxaha gaangiska ah si aad ah ayay ugu xirtaa ku lug lahaanshaha kooxaha gaangiska ah, taasi oo ah fikraddaha ay aamin yihiin kooxaha gaangiska ku lugta leh ee la wareystay (89% oo iyaga ka mid ah) iyo bulshada degaanka ku nool, hoggaamiyaasha bulshada, iwm labbadooduba.
- Inta badan dadka ku lug leh kooxaha gaangiska ee la wareystay (60%) waxay tilmaameen in ay carruuro leeyihiin, iyagoo ku dhawaad intooda badani (96%) tilmaameen in aanay rabin in carruurtoodu ku lug yeeshaan kooxaha gaangiska.
- Markii la waydiiyay waa maxay sababaha u waaweyn ee looga baxo kooxaha gaangiska 74% ka mid ah kooxaha gaangiska ku lugta leh ee la wareystay ayaa tilmaamay "in ay tahay waalid ay noqdeen," 65% ayaa tilmaamay mas'uuliyaddo qoys (tusaale daryeelka carruurta, qof qaraabo ah oo jiran, iyo shaqo la hayo), 58% ayaa tilmaamay guri ay yeesheen, iyo 54% ayaa tilmaamay talo/culay ay saareen xubin ka tirsan qoysku.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Waxaan u baahanahay qof talo na siiya oo fahamsan waxani."*

- Inta badan dadkii ra'yi ururinta ka jawaabay ama la wareystay waxay aaminsan yihiin in sababta u weyn ee ay ugu biireen kooxaha gaangiska ah ay tahay saboolnimo/lacag iyo lahaanshaha saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku jira kooxaha gaangiska.
- Shaqada, hawlo la qabto/barnaamijyo, iyo dadka la taliyayaasha ah ayaa la ogaaday in ay yihiin habka u sarreeya ee hoos loogu dhigi karo hawlaha gaangiska.

- Dadka ra'yi ururinta ka jawaabay ayaa ogaaday in rabshada, dambiyada mukhaadaraadka la xiriira, iyo cabsidu ay yihiin saameynta u weyn ee ay kooxaha gaangisku ku leeyihiin bulshada.

## Waxyaalo Muhiimka ah ee la Ogaaday ee la Xiriira Ilaha kala duwan ee Bulshada

Barnaamijyada bulshada ee sida gaarka ah loogu dejiyay in u adeegaan kooxaha dhallinyarada ah ee gaangiska ku lugta leh way ku yar yihiin Degaanka Multnomah. Si kastaba ha ahaatee waxaa jira, barnaamijyo badan oo isku aqoonsan in ay u adeegayaan kooxaha dhallinyarada ah ee gaangiska ku lugta leh iyagoo qaybka ah guud ahaan bulshadooda. Inta badan barnaamijyada loogu tala galay kooxaha gaangisku degaan ahaan ayaa dhaqaalihiisa la bixiyaa.

Inta badan barnaamijyada sida gaarka culayska saara shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ah waxay tilmaamaan in ay muhiimada siiyaan waxka qabashada, halka barnaamijyada u adeega kooxaha dhallinyarada ah ee gaangiska ku lugta leh iyagoo qaybka ah guud ahaan bulshadoodu ay tilmaameen in ay muhiimada siiyaan waxka qabashada iyadoo ay taasi soo raacdo ka hortaggu. Barnaamijyo kooban oo ku jira ra'yi ururinta ayaa muhiimada siiya in marka hore ka hortag la sameeyo.

Khariidada xogta la xiriirta ee la awoodday in la isku keeno waxay tilmaamtay in shantii sano ee la soo dhaafay ay barnaamijyadani noqdeen kuwo si aad ah u baahsan, iyagoo ka markii hore culayska saaraya faras magaalaha Portland iyo Waqooyi/Waqooyi-bari Portland hadana si isku mid ah u gaaraya guud ahaan degaanka, kaasi oo ay ka mid yihiin culay la saarayo degaanka Rockwood ee ka tirsan Gresham.

# Soo Koobidda Xogta

Qaybaha soo socdaa waxay soo koobaysaa xogta sida buuxda loogu qeexay *Qiimeynta Buuxda ee Kooxaha Gaangiska ee Degaanka Multnomah* (Juun 2014-kii), taasi oo bixinaysa macluumaad buuxda sidoo kalena sharaxaad ka bixinaysa dhibaatooyinka la xiriira turjumaada xogta.

## Qaabka bulshada Degaanka u nooshahay

Qaabka bulshadu u nooshahay Degaanka Multnomah wuu isbeddelay intii u dhaxaysay 2005 iyo 2012-kii, iyadoo guud ahaan degaanka ay korortay helidda waxbarasho iyo heerarka dakhli iyo guud ahaan hoos u dhac uu ku yimid dambiga. Iyadoo la eegayo qiimaha ay leeyihiin, sidan ay wax u socdaani waa wax fiican. Si kastaba ha ahaatee, waxay qarinaysaa isbeddelo walwal keenaya oo ka dhacaaya xaafaddo gaar ah kuwaasi oo la kulmaya dhibaatooyin bulsho oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin helidda waxbarasho iyo dakhliga oo hooseeya, cayrinta dugsiga la iska cayriyo oo sarreysa, iyo kororka shaqo la'aanta jirta, isticmaalka gargaarka dadweyne, dambiga.

> *Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Waxaan ka soo jeedaa guri sabool ah, waxay ahayd in aad naftayda badbaadiyo."*

Intii u dhaxaysay 2005 iyo 2012-kii, tirada dadka Degaanka Multnomah si aad ah ayay u korortay—ilaa boqolkiiba 15. Wakhtigan la joogo, dadka degaanka ku nool badankoodu waa Caddaan iyo dad aan ahayn Hisbaanik. Hisbaaniga, Aasiyaanka-Maraykanka ah, iyo Maraykanka Madow ayaa matala 11%, 8%, iyo 7% marka la eego tirada dadka, hadba sida ay u kala horreeyaan. Guud ahaan habka degaanku qoymiyaddaha badan uga kooban yahay ayaa wali qiyaastii sidiisii hore ah laga soo bilaabo 2005 ilaa 2012-kii, inkastoo ay jireen hannaan socod oo lagaga guurayo Waqooyi-bari iyo Koonfur-bari Portland iyadoo loo socdo xaafaddaha bariga ka xiga Jidka Interstate 205.

*Ra'yi Urrurin laga qaaday Bulshada Degaanka oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Goobta aan ku lugeeyo waa meel badbaado ah sidaasi oo kale ayayna ahayd muddo sanado ah. Labbada toogasho ee dhacday waxaa sababay guryaha dadka uu dakhligoodu hooseeyo."*

Dadka 24 jirka ah ama ka yar ayaa noqonaya kooxda da'ahaan u badan ee degaanka ku nool, iyadoo tiradoodu korortay laga soo bilaabo 2005-kii (inkastoo qaybta ay ka yihiin tirada guud ee degaanku ay hoos u dhacday). Carruurta da'doo tahay 17 ama ka yar ayaa ku ururrsan degaanada galbeedka ee xaduuda iyo xaafaddaha bariga kaga toosan I-205, oo ay ka mid yihiin Wood Village, Troutdale, iyo qaybo ka tirsan Gresham. Carruurta madow ayaa u muuqda inay ku ururrsan yihiin Waqooyiga Portland, xaafaddaha waqooyi kaga toosan I-84 iyo kuwa galbeedka kaga toosan I-205, iyo degaanada bariga kaga toosan I-205.

Kuwo badan oo degaanka ku nool (32%) ayaa ah koox dakhligoodu hooseeyo, oo hela $15,000 sanadkii ama inka hooseysa, iyadoo 17% ay yihiin koox hesha $15,000 ilaa $30,000. Saamiga dadka degaanka ku nool ee ka tirsan kooxaha dakhliga kala duwan leh si aad ah iskuma beddelin laga soo bilaabo 2005 ilaa 2012-kii. Kororka dakhli ee ugu weyn waxaa laga arki karaa kooxaha dakhligoodu yahay $60,000 ilaa $100,000; dadkani way kordheen tiro ahaan (iyagoo ahaa 44,831 hadana gaaray 73,158) iyo qiyaas ahaanba (iyagoo ahaa 7% hadana gaaray 10%). Xaafaddaha ay degan yihiin qoysaska uu dakhligoodu hooseeya ee u dhexeeya ($13,699 ilaa $20,000) waxaa ka mid ah OldTown; Portsmouth iyo Cully oo ku taala Waqooyi/Waqooyi-bari Portland; Powelhurst/Gilbert, Centennial, iyo Glenfair oo ka tirsan Koonfur-bari iyo Bariga Portland; iyo Rockwood, Centennial, Waqooyiga Gresham, Wood Village, Powell Valley, Waqooyiga bari ee Gresham, iyo Mt. Hood oo ka tirsan Gresham.

Intii u dhaxaysay 2005 iyo 2012-kii, heerka shaqo la'aanta degaanku waxay korortay iyadoo ahayd 4% hadana gaartay 6%, taasi oo ah koror gaaraya 16,800 oo qof. Gresham iyo Troutdale, tirada dadka helaaya taageerada dadweyne way saddex jibaaran tahay.

Qiyaasta guryaha qiimahoodu aadka u sarreeyaa waxay ku yaalaan degaanada West Hills iyo Arnold Creek iyadoo kuwo u hooseeyaa ay ku yaalaan Waqooyiga Portland, kuwaasi oo ku fidsan marinka I-205, iyo bariga I-205 ilaa Gresham, Wood Village, iyo Troutdale. Sida ay tahay qiyaasta dakhliga qoyska wali waa isku mid. Taasi waxaa dheer, qiyaas aan toos ahayn oo la xiriirta dakhligu waa qiyaasta boqolkiiba ee carruurta helaysa cuntada dugsiga oo bilaash ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay. Tani way ku kala duwan yihiin dugsiyadu, laakiin meesha ay ardayda u badan ee hesho cunto bilaasha/oo qiimaheeda hoos loo dhigay halka ay ku ururrsan yihiin waa Waqooyiga Portland, ee ku fidsan marinka I-205 (Lents iyo Powellhurst/Gilbert), iyo bariga I-205 (Glenfair, Rockwood, iyo Waqooyiga Gresham).

Helidda waxbarasho ee degaanka ayaa korortay ilaa 2005-kii. Tirada dadka degaanka ku nool ee jaamacadaha aaday ama helay shahaado jaamacadeed ama shahaadada mastarka ayaa korortay, iyadoo ay jirto tiro yar oo dadka degaanka ku nool ka tirsan oo aanan haysan shahaadada dugsiga sare. Si kastaba ha ahaatee, waxaa si cad loo arki karaa in aanay jirin qaybin sax ah oo la xiriirta helidda waxbarasho ee guud ahaan degaanka. Tusaale, kuwo badan oo ka mid ah xaafaddaha ku yaala Galbeedka Portland iyo bartamaha Koonfur-bari Portland, wax ka yar 26% dadka ku nool ayaa kaliya haysta shahaadada dusiga sare, GED, dugsi beddel ah oo ay dhamaysteen, ama heer tacliineed oo hooseeya. Taasi beddelkeeda, degaano badan oo ka tirsan I-205, sida Powellhurst/Gilbert, Mill Park, Glenfair, Rockwood, Centennial, Powell Valley, Waqooyiga Gresham, tani waa sida arrinku u yahay 56% ilaa 64% oo ka mid ah dadka degaanka.

Dadka doorashada isku diiwaan-geliyay ee ugu badan waxaa laga helay Jidka Highway 26, xaafaddaha ku yaala Arnold Creek neighborhood ee koonfurta I-5, iyo dhowr xaafaddood oo ku yaala bartamaha Koonfur-bari iyo Waqooyi-bari Portland, sida Mount

Tabor, Hosford-Abernathy, Irvington, iyo Beaumont-Wilshire. Iyadoo qiyaasta tirada u hooseysaa ay ka jirto waqooyiga Columbia Slough iyo xaafaddo kala duwan ee ka bilaabma bariga I-205 ilaa Gresham iyo Wood Village.

*Ra'yi Urrurin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Marka aan maqlo 'gaangis' waxaan iisoo muuqda taariikhdii 1980. Waa in aan ka fakarnaa habab cusub!!!"*

2010-kii, Tirakoobtii Maraykanka ee goobaha ay ku nool yihiin dadka ugu badan ee (Waqooyi-galbeed, Sunnyside, Creston-Kenilworth, King, qaybta galbeed ee Gresham-Rockwood) ay sidoo kale tahay goobta ay ku badan yihiin dadka aan caddaanka ahayni. Si kastaba ha ahaatee, tani may ahayn kaliya goobaha Tirokoobta lagu sameeyay ee ay jirtay dadka aan caddaan ahayn oo aad ugu urrursani. Dadka aan caddaanka ahayn sidoo kale waxay ku noolaayeen goobaha dadku aadka ugu badan yihiin ee ku yaala Waqooyiga Portland, xaafaddaha sida tooska ah galbeedka kaga toosan Jidka Interstate 205, degaanada bariga kaga toosan Jidka Interstate 205, iyo Wood Village iyo Bartamaha Waqooyi ee Gresham.

Xogta tirokoobta oo laga helay 2000 iyo 2010-kii ayaa tilmaamtay isbeddel ku yimid halka ay dadka caddaanka ahayni kaga nool yihiin degaanka. Qiyaasaha ugu weyn ee hoos u dhucu ku yimid waxay ku noolaayeen xaafadda Overlook ee ku taala Waqooyiga Portland, kuwo badan oo ka mid ah xaafaddaha bariga kaga toosan Jidka Interstate 5, iyo Rose City Park iyo Roseway/degaanka Koonfurta Madison ee bariga kaga toosan Jidka Interstate 84. Degaanada kororka aadka ahi ku yimid marka la eego tirada dadka aan caddaanka ahayn waxaa ka mid ah degaanada ka fog bartamaha (tusaale, qaybta galbeed ee degaanka galbeedka kaga toosan Forest Park/Waqooyi-galbeed Heights), xaafaddaha waqooyiga kaga toosan Jidka Interstate 84 laga bilaabo Troutdale Airport ilaa galbeedka (Wilkes iyo Fairview), iyo xaafaddo kala duwan oo ku yaala ama u dhow Gresham (Kelly Creek, Powellhurst-Gilbert, iyo Pleasant Valley). Wuu cad yahay habka isku socod ee looga guurayo Waqooyi-bari iyo Koonfur-bari Portland ee loo socdo xaafaddaha bariga ka xiga jidka Interstate 205.

Rockwood iyo Portsmouth ayaa ah meesha carruurta ugu badani ku nooshahay (tusaale, dadka 0 ilaa 17 jirka ah). Degaanada la mid ka ah ee laakiin tirada carruurta ku nooli ay hooseyso waxaa ka mid ah Irvington, Grant Park, iyo Roseway/Koonfurta Madison ee ku taala Waqooyi-bari Portland; Creston/Kenilworth iyo Lents oo ku yaala Koonfur-bari Portland; iyo inta badan Bariga Portland (Glenfair, Centennial, Hazelwood, Mill Park, iyo Powellhurst/Gilbert). Carruurta madow ayaa u muuqda inay ku urrursan yihiin Waqooyiga Portland; ee ku fidsan marinka I-5 ee waqooyiga faras magaalaha Portland; xaafaddaha galbeedka kaga toosan I-205; ee ku yaala dugsiyada degmada Parkrose iyo Reynolds; iyo inta badan Gresham, oo ay ka mid yihiin Rockwood iyoWood Village. Kuwo badan oo ka tirsan degaanadani, habka ay carruurta aan caddaanka ahayni ugu urrursan yihiin degaanadan wuxuu saddex jibaar ka badan tahay sida ay yihiin xaafaddaha Laurelhurst ama Koonfur-galbeed Hills.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Da' kala duwan ayaa xabsiga ku jirta ama dhintay, qofna iima tilmaamayo tayada nololeed ee ay tahay in la haysto."*

## Baahiyaha Adeeg

Xogta laga ururiyay qiimeyntani waxay bixisay macluumaad la xiriira arrimaha bulshada oo afar weji leh—carruurta ku dhalata miisaan hoose, dhalmada hooyooyinka da'da yar, hoy la'aan, iyo isticmaalka adeegyada daaweynta ee Degaanka dhaqaale ahaan u bixiyo ee ee la xiriira aalkolada iyo mukhaadaraadka —ee keena baahi degaan oo loo qabo adeegyada dadweyne. Caruurta ku dhalata miisaan hoose, gaar ahaan, waa xaalad adag oo xiriir la leh habka dhaqaale ee bulshada kaasi oo tilmaamaya faa'iido darada jirta, helidda waxbarasho oo hooseeya, [3] shaqo la'aanta jirta, iyo dakhliga hooseeya.[4] Runtii, iyadoo taasi ay jirto ayay hadana u eg tahay in hooyooyinka da'doodu aadka u yar tahay ay saameyn xun ku yeelato miisaanka carruurtu ku dhalato iyadoo ay la xiriirto degaanada dakhligoodu hooseeyo ee ay ku nool yihiin, iyadoo aanan xirnayna xaaladda gaarka ah hooyada.[5] Marka ay carruurtu dhalato miisaankooda oo aad u hooseeya, waxay khatar ugu sugan yihiin dhibaatooyin kala duwan iyo mararka qaarkood dhibaatooyin caafimaad oo khatar gelinaya, sidoo kale iyagoo khatar ugu sugan xaaladdo caafimaad oo jira wakhti dambe oo noloshooda ka mid ah (tusaale, dhiig karka, sonkorow, iyo wadne xanuun.).


Meesha ugu badan ee dhalashada carruurtu ku dhalato miisaan hoose ay ku urursan yihiin waa St. Johns (gaar ahaan xaafaddaha Portsmouth), xaafaddaha Boise-Eliot ee ku yaala bartamaha Waqooyi-bari Portland, iyo labba goobood oo ku yaala bariga Degaanka Multnomah (ee dugsiyada David Douglas iyo Centennial). Goobaha Bariga Degaanku wax la mid yihiin degaanada leh heer qiyaas oo cunto bilaasha/oo qiimaheeda hoos loo dhigay la bixiyo. Heerarka qaadida uurka ee hablaha yar yar ayaa isla meelahaasi ah kuwo sarreeya sida dhalashada dhallaanku ku dhasho miisaan hoose oo kale iyadoo taasi ay dheer tahay Cully iyo Roseway/degaanka Koonfurta Madison, waqooyiga/waqooyiga bari ee Gresham, Gresham-Rockwood, iyo Parkrose Heights/Hazelwood/Russell oo ah qayb ka mid ah bariga Degaanka Multnomah. Meesha ay aadka ugu urursan yihiin hablaha yar yar ee uurka qaadaa waa David Douglas iyo dugsiyada degmada Reynolds.

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Tani maaha mas'uuliyada ay ciidamada ammaanku kaligood leeyihiin. Waxaan u baahanahay wada*

[3] M. Hack, D.J. Flannery, M. Schluchter, L. Cartar, E. Borawski, iyo N. Klein. "Natoojooyinka Dhallinyarada Qaangaarka ah ee leh Dhallaan ku Dhasha Miisaankooda oo Hooseeya." *Wargeysa Daawada ee New England* . Janaayo 17, 2002-kii. Booga 346, Lambarka 3. Oo laga heli karo http://www.couveuseouders.nl/data/files/hack_nejm_2002%5b1%5d.pdf.

[4] L.C. Messer, J.S. Kaufman, N. Doel, A. Herring, iyo B.A. Laraia. "Kala Saaridda soo Gaaridda Dambiyadda Rabshadda wata iyo Natiijooyinka Dacdarada Dhalmada: Qaabka Degaan ahaan-eoo Loo Qeexay Daraasad ay Sameeyeen Aqoon yahano." *Wargeyska Caalamiga ah ee Qaabka Caafimaadka.* 2006, 5:22. Oo laga heli karo http://www.ij-healthgeographics.com/content/5/1/22.

[5] C. Dibbn, M. Sigala, iyo A. Macfarlane. "Go'doominta Degaanka, Xaqiiqda Dadweyne, iyo ku Dhalashada Carruurtu ku Dhalato Miisaan hoose ee Ingiriiska: Ma jirtaa Xaqiiqo dhab ah oo jirta 'Degaanka ay Saameysay'?" *Wargeyska Cuddurada Faafa iyo Caafimaadke Bulshada.* Diisambar 2006; 601(12): 1053-1059. Oo laga heli karo http://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC2465519/.




Qiimeyntani kaliya waxaan heli karaynay xog kooban oo ku saabsan hoy la'aanta iyo isticmaalka mukhaadaraadka, mana kala cada in isbeddelada mar dambe dhacay ay sabab u ahayd siyaasadda isbeddeshay, dhaqaalaha, baahida, ama ka faa'iideysiga. Qiyaasaha dadka aan hoyga ee Degaanka Multnomah way kala duwanayd laga soo bilaabo 2010 ilaa 2013-kii laakiin waxaa muuqata in uu aad u sarreeyo marka loo eego degaanada u dhow dhow, ama gobolada kale ee Portland ku yaala. 2013-kii Degaanka Multnomah waxay dhaqaalihiisa bixisay wax ku dhow 92,000 oo ah daaweynta aalkolada iyo mukhaadaraadka kuwaasi oo ahaa maalmihii sariirta la saarnaa; tani waxay ka dhigan tahay 10% oo ah hoos dhac yimid laga soo bilaabo 2011-kii. Ka faa'iidaysiga dhaqaalaha Degaanku bixayay ee tiro ahaan loogu tala galay daaweynta bukaan socodku, wuxuu ahaa mid yara degan sanadihii la soo dhaafay, iyadoo 6,559 oo ah tirada loogu tala galay la isticmaalay 2009-kii iyo 6,639 oo ahaa 2013-kii.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Dad badan oo waaweyni maalgashi kuma samayn waxbarashadayda… dugsigu wuxuu ahaa sida shaqo oo kale, oo aan ciddina rabin in ay aado."*

## Dugsiyada

Degaanka Multnomah waxaa jira sagaal dugsi oo degmadu leedahay Adeega Waxbarashada Degmada ee Degaanka Multnomah (ESD),

*Ra'yi Ururin laga qaaday Shaqaale Dugsi oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Kuwo ka tirsan ardaydu waa sabool waxayna u haystaan in [gaangisku] ay yihiin halkii ay heli lahaayeen lacag iyo farxad. Waxaa suuragal ah in ayna ka fakarin in ay jiraan wax kale oo u banaani."*

iyo ku dhawaad 90 dugsi oo kala duwan oo loogu tala galay ardayda gaartay dugsiga sare. Isqoridda dugsiyada ee guud ahaan degmooyinka waxay ahaayeen kuwo xasiloon laga soo bilaabo 2012-kii. Sanad dugsiyeedkii 2013-2014-kii, Portland waxaa dugsiyada isqoray dadkii ugu badnaa oo dhanaa (47,111), iyadoo ay soo raaceen Gresham-Barlow oo ahayd (12,180), Reynolds oo ahayd (11,691), iyo David Douglas (10,946).

Sida loo kala matalayay qowmiyad ahaan way kala duwanayd dugsiyada degmooyinka. Ardayda Corbett iyo Riverdale ayaa ah kuwo inta badan caddaan ah (86% iyo 88%, hadba sida ay u kala horreeyaan). Degmooyinka qiyaasta ardayda Maraykanka Madow ee dhigataa ay ugu badan tahay waa Multnomah ESD (22%) iyo Parkrose (12%). Reynolds waxay leedahay qiyaasta ugu badan ee ardayda Hisbaanik/Laatiinka ah ee dhigata (39%), oo waxoogaa ka yara badan qiyaasta ardayda caddaanka ah. Degmooyinka Centennial, David-Douglas, iyo Gresham-Barlow, ardayda Hisbaanik/Laatiinka ah waxay qiyaastii u dhigantaa 25% ardayda isqorta.

Laga soo bilaabo 2010 ilaa 2013-kii, ardayda Maraykanka Madow ah oo badan ayaa tallaabooyin anshaxa la xiriira laga qaaday marka loo eego ardayda qowmiyadaha kale ka tirsan:

- Guud ahaan dhamaan dugsiyada degmooyinka Multnomah, qiyaastii 18.13% oo ardayda Maraykanka Madow ah ayaa laga cayrshay sanad dugsiyeedkii 2012-2013-kii. Tani waa 5.68% marka la barbar dhigo ardayda caddaanka ah.
- Qiyaasta isbarbardhiga ardayda (RRI)[6] ayaa tilmaamay in ardayda Maraykanka Madow dugsiga laga cayriyo in ka badan saddex jibaar (3.2) marka loo eego qiyaasta ardayda caddaanka ah. Ardayda Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ayaa soo raaca, iyadoo qiyaastoodu tahay labba jibaar (2.0) marka loo eego qiyaasta ardayda caddaanka ah.
- Qiyaasta RRI ee cayrinta ardaydu wuu kordhay laga soo bilaabo 2009-2010-kii kaasi oo la xiriira dhamaan qaybaha kala duwan ee ardayda aan caddaanka ahayn marka laga reebo ardayda Aasiyaanka-Maraykanka ah.

Kala duwanaanshaha qowmiyaddeed ee u dhexeeya ardayda Maraykanka Madow iyo ardayda kale waa mid cad marka mid mid loo eego dugsiyada degmada iyo guud ahaan Degaanka Multnomah.

Qoymiyadda tallaabada anshaxa la xiriira laga qaaday uu u hooseeyay waxay ahaayeen ardayda Aasiyaanka-Maraykanka.

Qiyaasta iskaga tegidda dugsiga degmooyinka way ku kala duwan yihiin degmooyinku, iyadoo qiyaasta ugu sarraysa ay yeesheen Dugsiyada Degmada Reynolds (5.4% marka la barbardhigo gobolka oo ah 4% ee sanad dugsiyeedkii 2012-2013-kii). Dhamaan degmooyinka kale qiyaasaha ardayda dugsiyada iskaga tegay waxay ahaayeen sidoodii hore ama way ka hooseeyeen qiyaasta gobolka (mararka qaarkood aad ayay u hooseeyeen, dugsiyada degmooyinka Corbett [0.9%] iyo Riverdale [0.4%]).

## Dambiyada la Xiriira Kooxaha Gaangiska

Degaanka Multnomah County ma laha hab isku xiran oo lagu ogaanayo ama lagula soconayo dhacdooyinka la xiriira kooxaha gaangiska iyo shakhsiyaadka ka tirsan, taasi oo adkaysa in laga jawaabo su'aalaha lagu soo bandhigay Habka Qiimeynta Kooxaha

[6]Wixii wada hadal ah ee ku sabsan qiyaasta isbarbardhiga ardayda, fadlan ka fiiri http://ojjdp.gov/ojstatbb/dmcdb/asp/whatis.asp.

Gaangiska ee OJJDP, sida tirada ay le'eg tahay xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka jira Degaanka Multnomah iyo tirada dambiyada la xiriira kooxaha gaangiska ee la galay. Inta badan su'aalaha ku saabsan dambiyada la xiriira kooxaha gaangiska ah, waxaan beddel ahaan isticmaalnaa dambiyada rabshadaha wata.

Marka laga yimaado xaddidnaant xogta jirta ee la xiriirta dambiyada ay galaan kooxo gaangis ah oo gaar ah, waxaan awoodnay in aan la kulano kooxo ka tirsan ciidamada ammaanka si aan u ogaano liiska ugu yaraan 133 kooxo gaangis ah oo ka jira Degaanka Multnomah oo ay ka warqabaan ciidamada ammaanka ee degaanku iyo shaqaalaha u adeegaa. Kuwo ka mid ah kooxaha gaangiska ee la ogaaday waa kooxo ka soo farcamay oo xiriir la lahaa kooxaha gaangiska ah ee waaweyn. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo isbahaysiga u dhexeeya kooxaha gaangisku uu inta badan isbeddelo, koox kastoo ka tirsan kooxaha gaangiska ayaa la ogaaday in ay wali yihiin kuwo sii wata in ay koox gaar ah ahaadaan marka la eego liiska.

Xogaha kale ee kooxaha gaangiska u gaarka ah ee la awoodday in la ururiyo ee dacwadooda ay eegeen ama ay soo saareen Xafiiska Qareenka ee Qaybta Kooxaha Gaangiska ee Degaanka Multnomah. Laga soo bilaabo 2012 ilaa 2013-kii, kooxdani waxay soo saareen 41% oo ah dacwado intii hore ka yar oo la xiriira dambiyada ay kooxaha gaangisku galeen (isagoo ahaa 253 dacwadood ka dibna noqday 149) laakiin ay jireen 100% wax ka badan oo la xiriira dambiyada fudud ee kooxaha gaangisku galeen (isagoo ahaa 51 ka dibna noqday 102). Inta badan, haddii ayna ahayn dhamaan, kororka dacwadaha dambiyada fudud ee la xiriira kooxaha gaangiska waxaa u sabab ah dhaqaalaha lagu bixiyay shaqaalaha dheeraadka ah iyadoo la isticmaalayo lacagta dowladda federaalka.


Waxaan xog ka soo ururinay barnaamijka loo yaqaan Safe Streets Project, oo ah dadaal wadajir ah oo ay wadaan ciidamada ammaanka ee degaanka, Qaybta Adeegyada Dhallinyarda, Maamulka Dhalinyarada Oregon, Xafiiska Qareenka Degmada si ay u ogaadaan dhallinyarada ku lugta lahaa dambiyadda halista ee ka dhexeeya labbada qof iyo/ama dambiyada la xiriira hubka. Liiska barnaamijka Jidka Nabada ee dhalinyarada "Safe Street youth" waxaa ka tirsan qiyaastii 139 dhallinyaro ah oo da'doodu u dhaxayo 12 jir ilaa 22 jir (oo ah qiyaastii 16.9 sanadood ). Qiyaasta da'eed ee dambigii u horreeyay ee la soo gudbiyay barnaamijku waa 13.3 sanadood, iyadoo dhallinyarada qiyaastoodu ahayd 5.5 ee halkii qof ee la soo gudbiyayba. Ku dhawaad qayb ka tirsan dhallinyaradan la qiimeeyay waxaa la gartay in ay khatar aad ah ugu sugan yihiin dambi ay galaan. Intooda badan (85%) waa rag, iyadoo 77% ka mid ahi ay yihiin dhallinyaro aan caddaan ahayn. Kuwa ugu badan dambiyadda lagu soo oogay dhallinyaradani ee go'aanka maxkammeed laga gaaray waxay ahaayeen weerar(iyadoo 30 dhallinyaro ah dacwad lagu soo oogay, ama u dhiganta 21.6%), dhaca la geystay (oo ahaa 28 dhallinyaro ah ama u dhiganta 20.1%), burcadnimo (oo ahayd 25 dhallinyaro ah, ama u dhiganta 18%), iyo hubka sharci darada loo haysto (oo ah 19 dhallinyaro ah, ama u dhiganta 13.7%).

*Ra'yi Ururin laga qaaday Bulshada Degaanka oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Waxaan Powellhurst/Gilbert ku noolaa ilaa 1977-kii. Hada waxaan dareemayaa ammaan marka loo eego markii u horreysan ee aan halk u soo guuray. Waxaan ka tirsanahay dadka xaafadda ilaaliya."*

## Halkee ayay dambiyada la xiriira kooxaha gaangisku ka dhacayaan?

Dadaaladii ay dhawaan sameeyeen hay'adda badbaadada bulshadu si ay u dhiiri geliyaan oraahda loo yaqaan calanka kooxaha gaangiska "gang flag"ayaa muujiyay sawirka u horreeya ee halka ay dambiyada la xiriira kooxaha gaangiska ka dhacayaan marka la eego Degaanka Multnomah. Wakhtigu waa mid kooban, laakiin khariidadu waxay si cad u tilmaamaysaa in dhaqdhaqaaqyada ay wadaan kooxaha gaangisku ay u muuqdaan in ay ku urrursan yihiin xaafadda Rockwood ee ku taala Gresham, xaafaddaha Humboldt iyo King ee ka tirsan Waqooyi-bari Portland, iyo faras magaalaha/OldTown/Chinatown ee xaafaddaha Portland.

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Walaalkay wuxuu kooxaha gaangisku biiray ka dib markii aabahay la xiray...wakhtigii lagu xukumay ayuu wali ku jiraa [xabsiga]"*




Wicitaanka la soo wacay markii ay dhaceen weerarada keena dhaawaca halista ah iyo toogashooyinka ayaa loo isticmaalay in ay noqdaan tallaabooyin beddel ah marka ay noqoto rabshadaha ay sameeyaan kooxaha gaangiska ah. Guud ahaan dalka, dhacdooyinka la soo sheegay ee ku saabsan rabshadaha guriga ee la xiriira weerarada keena dhaawacyada halistu hoos ayay u dhaceen 24% laga bilaabo 2003-2004-kii ilaa 2012-2013-kii. Si kastaba ha ahaatee warbixintu waxay kordhisay (>8%) degaanada qaarkood, sida Rockwood. Intii u dhaxaysay 2003-2004-kii iyo 2012-2013-kii, sida ay isku xiran yihiin dhacdooyinka la sheegay wuxuu isku beddelay sida soo socota:

- Ka soo wareegay Waqooyi/Waqooyi-bari Portland
- Uu sidiisii hore ahaa marka laga hadlayo faras magaalada/Old Town/Chinatown
- Uu sidiisii hore ahaa degaanada ku yaala Powellhurst-Gilbert
- U soo wareegay Glenfair iyo Rockwood

Guud ahaan dalka, wicitaanka la soo wacay ee la xiriira "xabadaha la riday" hoos ayay u dhaceen 16% laga bilaabo 2003-2004-kii iyo 2012-2013-kii. Muddadaasi isku xirnaanta meelaha "xabadaha laga riday" way isbeddelaan, iyagoo markii hore ka imaanayay degaanka kaliya ee dadku ku urrursan yahay ee Waqooyi/Waqooyi-bari Portland (tusaale, inta badan xaafaddaha Humboldt, Boise, King, iyo Vernon) iyadoo xabadii la ridayay ay hada noqotay mid baahsan, oo yar, oo kooxo aan darnayn ka dhex jirta.

Guud ahaan heerka Qaybta 1 ee la soo sheegay ee Dambiyada Rabshada wata ee Degaanka Multnomah wuxuu kordhay 1% laga bilaabo 2011-kii ilaa 2013-kii, laakiin xaafadda Rockwood, qiyaastu way korortay iyadoo gaartay 62%. Khariidadaha labbadan sano waxa muujinayaan in tiro is le'eg oo dambiyo ah, laakiin bartamahii 2013-kii kuwo badan oo ka tirsan dambiyadaasi waxay ku urrursanaayeen Rockwood.

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Ma arko dhaqdhaqaaq ay wadaan kooxaha gaangisku activity waxay ila tahay in arrinta wax weyn laga dhigay."*

## Saamaynta ay ku leedahay Dadka ay dhibaatadu soo gaarto

Xog laga helay 2012 *Qiimeynta Baahida Dadka Dhibaatadu ka soo gaarto Dambiga ee Oregon* iyo *2012 Ra'yi urrrurintii Qaranka ee Dhibaataada Dambiyeed* (NCVS) ayaa loo isticmaalay in lagu sharaxo saameynta dambiyadu ku yeeshaan qofka dacadiga loo geysto. Inkastoo warbixinta Oregon ayna si gaar ah u tilmaamin dadka dhibaatadu ka soo gaartay rabshadaha la xiriira kooxaha gaangiska ah, waxay raacinaysaa macluumaadka dadka dhibaatadu ka soo gaartay. NCVS waxay raacisay xog la xiriirta dhibaataynta ay geystaan kooxaha gaangiska ahi.

Qiimeynta *Baahida Dadka Dhibaatadu ka soo gaarto Dambiga ee Oregon* waxay tilmaamtay in dadka dhibaatadu ka soo gaartay dambiyaddu' adeegoodii u weynaa ee aan la buuxinini uu ahaa taageerada dhaqaale ee degdega ah, dhexdhexaadinta qofka dhibaatadu soo gaarto/dambiilaha, helidda macluumaad ku saabsan ama taageero la xiriirta qabashada hawshamagdhawga. Caqabadaha u weyn ee la ogaaday ee la xiriira helidda adeegyada waxay ahayd iyadoon aan laga warqabin in ay jiraan adeegyadu, cabsi la qabo, iyadoo aan la awoodin adeegyada, iyo adeegyada oo ah kuwa aan la heli karin. Dadku aanay dhibaatadu ka soo gaarin rabshadaha guriga ee la xiriira weerarada keena dhaawacyada halistu waxay tilmaameen in aanay aad ugu faraxsanayn habka nimaadka cadaalada ee dambiyadu u shaqeeyo (2.38 marka la isticmaalo qiyaasta 1= aad ugu faraxsanayn ilaa 4=aad ugu faraxsan). Dadka muhaajiriinta ah ee asal ahaan ama qowmiyad ahaan laga tiro badan yahay ayaa ka mid ahaa dadka dhibaatadu ka soo gaartay dambiga ee aan sida fiican adeega u helin. Dadkani waxay soo sheegeen in aanay kalsoonayn in ay ku soo dhawaadaan nidaamka cadaalada ee dambiyada.

NCVS ra'yi ururinteedii kuma soo darin Oregon, laakiin waxay ku dartay xogta dadka dhibaatadu ka soo gaartay kooxaha gaangiska ah. Warbixintu waxay tilmaantay, heer qaran ahaan, inta badan dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangisku (65%) ay yihiin rag. Dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska ayaa qiyaastii 1.35 jeer ay u badan tahay in ay rag noqdaan marka loo eego dadka dhibaatadu ka soo gaarto dambiyada kale. Dadka aan caddaanka ahayn ayaa qiyaastii 1.31 jeer ay u badan tahay in ay noqdaan dad dhibaato ay ka soo gaarto kooxaha gaangiska ah marka loo eego dambiyada kale. Dhibaataynta ay geystaan kooxaha gaangiska ahi waxay u muuqataa in ay sida caadiga ah ka dhex dhacdo dadka dhallinyarada ah marka loo eego dadka waaweyn.

Ta inta badan soo noqnoqota ee la soo xigtay ee la xiriirta saamaynta maskaxeed ee ay dambiyada ay kooxaha gaangisku u geystaan dadka ay dhibaatada soo gaarsiiyeeni waxa ahayd xanaaq. Dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska ayaa qiyaastii 1.27 jeer ay u badan tahay in ay noqdaan dad xanaaq badan iyadoo ay sababtu tahay dambiga laga galay marka loo eego dambiyada kale. Inka badan kala bar dadka ay dhibaatadu ka soo gaartay kooxaha gaangiska ayaa qiyaastii (69%) dareemay walaac/walwal, ayaa

qiyaastii (69%) dareemay in aanay badbaado qabin, ayaa qiyaastii (52%) dareemay nuglaansho, ayaa qiyaastii (57%) dareemay in lagu xadgudbay, iyadoo qiyaastii (64%) ay dareemeen aamin la'aan.

Dadka yar oo ka tirsan dadka dhibaatadu ka soo gaartay dambiga ayaa taageero raadsada, iyadoo dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska ay xataa intaasi ka yar tahay in taasi ay yeeleen. Kaliya 12% oo ka mid ah dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska ayaa soo sheega in ay u baahan yihiin taageero dad khibrad leh oo la siiyo oo la xiriirta dareenka ay dareemeen ee ah in ay yihiin dadka dhibaato ay soo gaartay. Ku dhawaad dhamaan dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska oo ah qiyaastii (99.4%) ayaa tilmaamay in ayna waligood taageero ka helin hay'addaha adeegyada ee u qaabilsan dadka dhibaatadu soo gaarto. Iyadoo ku dhawaad afar meelood hal meel dadka ay dhibaatadu ka soo gaarto kooxaha gaangiska ay soo sheegeen in ay u baahan yihiin taageero caafimaad oo la xiriirta dhibaatada ay dareemeen ee ah in ay yihiin dadka dhibaato ay soo gaartay.

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Noqo qof ka qayb-qaadanaya, oo naxariis leh sidoo kalena ah xubin bulshada ka tirsan oo dadka daryeela. Noqo qof u dooda sinnaanshaha & qaababka sinnaansho."*

Inka badan kala bar dadka ay dhibaatadu ka soo gaartay kooxaha gaangiska ayaa qiyaastii (53.9%) aan booliska u soo sheegin dhibaatada loo geystay. Qiyaastani waxay la mid tahay ta dadka kale ee ay dhibaatadu soo gaarto (57%), inkastoo ay dadka dhibaatadu ka soo gaartay kooxaha gaangiska ay qiyaastii 4.4 jeer ay u badan tahay in ay yiraahdaan in aanay booliska u soo sheegin dhibaatada gaartay sababtoo ah "booliska oo ah kuwo eexasho sameeya." Waxay u badan tahay in qiyaasta dadka ay dhibaatadu ka soo gaartay kooxaha gaangiska ee aan oo sheegin dhibaatada soo gaartay ee la xiriirtay cabsi ay ka qabaan aargoosi ay 2.6 jeer ka badan tahay dadka kale ee dhibaatadu soo gaarto.

## Fikraddaha ay Bulshadu ka aaminsan yihiin

Isku keenidda la isku keenay xogta tayada leh ee ku saabsan fikraddaha ay bulshadu ka aaminsan yihiin dambiyada la xiriira kooxaha gaangiska waxay ahayd dadaal ay samaysay bulshadu. Hawsha waxaa horseed ka ahaa Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah' Xaruntiisa Awoodsiinta Bulshada iyadoo la isticmaalayo internet-ka iyo nuqulo ka tirsan ra'yi ururintii la sameeyay, iyo wareysiyo fool ka fool ah, iyadoo hawsha ay fududeeyeen kooxaha wax u kuurgalaa. Arday ka socota Dugsiga Gaarka ah ee LEP ayaa isku duba riday hawsha samaynta iyo ku baahinta ardayda iyo dugsiga ee ra'yi urrrurinta. Inka badan 200 oo arday, 150 oo ah bulshada degaanka ku nool, iyo 100 ka mid ah hoggaamiyaasha bulshada ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta. Inka badan 80 oo ah shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa ka qayb-qaatay wareysiyo fool ka fool ah. Dadka jawaabaha bixiyay ee dheeraad ahaa oo matalaya hay'addaha dhallinyarada u adeega, waalidiinta iyo xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska, iyo shaqaalaha dugsiga ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta (iyadoo tiradoodu dhanayd 43, 25, iyo toddoba qof, hadba sida ay u kala horreeyaan). Taasi waxaa dheer, in wax ka badan 200 oo dhallinyaro ah, dadka waaweyn ee siyaasadda dejiya, iyo hoggaamiyayaasha bulshadu ay qabteen hawsha sidoo kalena ay soo gaabiyeen ra'yi ururinta iyadoo halka hawsha lagu qabtay ay ahayd Shir Sannadeedkii Guddiga ka Hortagga Rabshadaha Dhallinyarada ee Multnomah ee dhacay Abriil 5, 2014-kii. Tiro dhan sagaal oo ka mid ah kooxaha wax u kuurgala oo leh waalidiin, xubnaha ka tirsan qoys, iyo shakhsiyaad xiriir la leh kooxaha gaangiska kale ayaa laga sameeyay toddobada meelood oo kale duwan.

Dadka jawaabaha bixiyay heshiis kuma ahayn in kooxaha gaangisku ay ka jiraan dugsiga ama bulshada dhexdooda.

- 25% oo ardayda ka mid ah ayaa yiri haa
- 40% oo macalimiinta ka mid ah ayaa yiri haa
- 80% oo ah bulshada degaanka ku nool iyo hoggaamiyayaasha bulshada ayaa yiri haa

- 90% oo ka mid ah waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayaa yiri haa.

Dambiyada rabshadaha wata iyo cabsidu ayaa halka sare ka galay dhibaatooyinka la xiriira kooxaha gaangiska ee ay ogaadeen hoggaamiyayaasha bulshada, dadka degaanka ku nool, iyo waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska. Shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ah ayaa saddexda shay ee ugu weyn ee ay sameeyaani ahayd rabshadaha ka dhex dhaca kooxaha gaangiska, isticmaalka aalkolada, iyo dambiyada mukhaadaraadka la xiriira.

**Lixda Dhibaato ee uu Weyn marka la eego Dhibaatooyinka la xiriira Kooxaha Gaangiska ee Bulshada ka dhex jira, Sida ay sheegeen …**

| … Hoggaamiyaasha Bulshada | … Bulshada Degaanka ku Nool | … Waalidiinta/ Qoysaska leh Qof Dhallinyaro ah oo Xiriir la leh Kooxaha Gaangiska | … Shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska |
|---|---|---|---|
| 1. Dambiyada rabshadaha wata<br>2. Cabsida<br>3. Carqalada qoyska<br>4. Carqalada dugsiga<br>5. Dambiyada hubka<br>6. Dambiyada mukhaadaraadka | 1. Dambiyada mukhaadaraadka<br>2. Cabsida<br>3. Dambiyada rabshadaha wata<br>4. Dambiyada hubka<br>5. Buuqa dadweynaha<br>6. Dagaalada | 1. Dambiyada rabshadaha wata<br>2. Cabsida<br>3. Dambiyada hubka<br>4. Dambiyada mukhaadaraadka<br>5. Wax burburinta/derbi wax ku qoridda<br>6. Dambiyadda hantiyeed | 1. Iska hor imaadka kooxaha gaangiska<br>2. Isticmaalka aalkolada<br>3. Dambiyada mukhaadaraadka<br>4. Dambiyada hubka<br>5. Dhaca<br>6. Weerarka/fal dambiyeedka |

- Hoggaamiyayaasha bulshada ayaa soo xigtay in carqalada qoyska iyo dugsiga la soo derista ee dhibaatooyinka la xiriira kooxaha gaangiska ay tahay ta u weyn ee bulshada ka dhex jirta inta badana soo noqnoqota marka loo eego jawaabaha dadka kale ku bixiyeen ra'yi urrurinta.

- Bulshada degaanka ku nool uma aqoonsan wax burburinta/derbi wax ku qoriddu ay tahay dhibaato weyn oo xiriir la leh kooxaha gaangiska, inkastoo ay ardayda iyo shaqaalaha dugsigu labbadooduba tilmaameen in derbi wax ku qorriddu tahay calaamaddooda u weyn ee tilmaamaysa in ay jiraan kooxo gaangis ahi.

- Kuwo ka mid ah dadkii inta badan jawaabaha bixiyay, saboolnimada iyo lahaanshaha saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan oo ka mid kooxaha gaangiska in ay ahaayeen sharaxaada u weyn ee la xiriirta sababta qof dhallinyaro ahi uu ugu biiri karto kooxaha gaangiska.

- Dadka degaanka ku nool, waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska iyo kooxaha dhallinyarada ah ee gaangiska ku lugta leh ayaa ogaaday "in xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka soo guuraya degaanada kale" ay tahay sababta u weyn ee looga mid noqonayo kooxaha gaangiska.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Ma rabo in carruurtayda arkaan ama sameeyaan wax la mid ah [wixii aan sameeyay]. Maaha badbaado, waad dhiman, ama xabsi ayaad ku dambayn."*

**Lixda Sababood ee uu Weyn ee Dhallinyaradu ugu Biiraan Kooxaha Gaangiska, Sida ay sheegeen…**

| … Ardayda Sheegay In ay ka Tirsan yihiin Koox Gaangis ah | … Hoggaamiyaasha Bulshada | … Bulshada Degaanka ku Nool | … Waalidiinta/ Qoysaska leh Qof Dhallinyaro ah oo Xiriir la leh Kooxaha Gaangiska | … Shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska |
|---|---|---|---|---|
| 1. Lacag<br>2. Baashaal<br>3. Ixtiraam<br>4. Illaalin<br>5. Xubin qoyska ka tirsan oo ku jira kooxaha gaangiska<br>6. Si fiican loogu xirmo | 1. Saboolnimo<br>2. Saaxiib/Xubin qoyska ka tirsan oo ku jira kooxaha gaangiska<br>3. Dareemaya in la jecel yahay ama ka mid yahay<br>4. Dhibaatooyin qoys<br>5. Wax hawlo ah oo aan jirin<br>6. Dhibaatooyin dugsi | 1. Saboolnimo<br>2. Saaxiib/Xubin qoyska ka tirsan oo ku jira kooxaha gaangiska<br>3. Xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka soo guuray degaan kale<br>4. Wax hawlo ah oo aan jirin<br>5. Dareemaya in la jecel yahay ama ka mid yahay<br>6. Dhibaatooyin qoys | 1. Saaxiib/Xubin qoyska ka tirsan oo ku jira kooxaha gaangiska<br>2. Saboolnimo<br>3. Xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka soo guuray meelo kale<br>4. Dhibaatooyin qoys<br>5. Wax hawlo ah oo aan jirin<br>6. Caajis | 1. Saaxiib/Xubin qoyska ka tirsan oo ku jira kooxaha gaangiska<br>2. Saboolnimo<br>3. Dhibaatooyin qoys<br>4. Dareemaya soo dhaweyn la'aan<br>5. Xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka soo guuray meelo kale<br>6. Wax hawlo ah oo aan jirin |

- Shaqooyinka ama tababarka shaqo, talo siinta, iyo barnaamijyada madadaalo/hawl qabasho ayaa halka sare ka galay istaraatajiyada hoos loogu dhigi karo hawlaha gaangiska.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Aabahay, walaalkay, eedaday, iyo hooyaday waxay ku jiraan kooxaha gaangiska."*

- Waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayaa tilmaamay "ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta" ay tahay ta ugu weyn ee istaraatajiyad ahaan hoos loogu dhigi karo hawlaha gaangiska.

- Bulshada degaanka ku nool iyo waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangisku waxay jeclaan lahaayeen in ay arkaan joogitaan boolis oo intii hore ka badan iyo illaalin taasi oo ah hab looga hortagayo ka mid noqoshada kooxaha gaangiska iyo hawlaha kooxaha gaangiska.

**Lix Waxyaabood oo ay Tahay in la Qabto si loo Yareeyo Hawlaha Kooxaha Gaangiska (sida ay isku Xigaan), Sida ay sheegeen …**

| … Hoggaamiyaasha Bulshada | … Bulshada Degaanka ku Nool | … Waalidiinta/Qoysas ka leh Qof Dhallinyaro ah oo Xiriir la leh Kooxaha Gaangiska | … Shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska |
|---|---|---|---|
| 1. Shaqooyinka/ tababarka shaqo<br>2. Talo siinta<br>3. Barnaamijyada madadaalo<br>4. Barnaamijyada dugsiga<br>5. Ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta<br>6. Waxbaridda | 1. Shaqooyinka/ xirfadda shaqo<br>2. Talo siinta<br>3. Waxbarasho tayo leh iyo guulaha waxbarasho<br>4. Barnaamijyada carruurta iyo dhallinyarada<br>5. Adeegyada caafimaad<br>6. Illaalin boolis oo dheeraad ah | 1. Ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta<br>2. Shaqooyinka/tababarka shaqo<br>3. Barnaamijyada dugsiga<br>4. Barnaamijyada madadaalo<br>5. Talo siinta<br>6. Joogitaanka booliska | 1. Barnaamijyada madadaalo / hawl qabasho<br>2. Talo siinta<br>3. Shaqooyinka/tababarka shaqo |

## Hoggaamiyayaasha Bulshada

Qiyaastii 100 ka tirsan hoggaamiyaasha bulshada ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta, iyadoo loo qaybiyay laguna buuxiyay internet

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Waxaan jeclaan lahaa in aan qabto shaqo kasta oo aan heli markaan ku soo laabto bulshadayda."*

ahaan iyo nuqullo laga sameeyay. Hoggaamiyayaasha bulshada ee ka qayb-qaatay ra'yi ururinta ayaa caadiyan ah kuwa matala ururada aan faa'iido doonka ahayn iyo magaalada ama dowladda degaanka. Saddex meelood hal meel ayaa ah maamulayaal iyo horjoogayaal, halka 24% kale ay si toos ah ugu lug leeyihiin gudbinta adeega. Haween badan ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta marka loo eego tirada ragga (55% vs. 38%), iyadoo 70% dadka jawaabaha bixiyay ay ahaayeen dad caddaan ah. Ku dhawaad saddex meelood labba meel qiyaastii (62%) hoggaamiyayaasha bulshada ee jawaabaha bixiyay ayay da'doodu u dhaxaysaa 40 iyo 64 jir, iyadoo 23% ay yihiin 30 ilaa 39 jir. Inta badan, dadka jawaabaha bixiyay ayaa ahaa kuwo shaqadooda hayay in ka badan 20 sanadood. Ugu yaraan 40% ayaa waayo-aragnimo qof ahaaneed u leh kooxaha gaangiska, taasi oo inta badan ah hab xirfaddeed.

Ururada ay hoggaamiyayaasha bulshadu matalaan ee wada shaqayn la leh noocyo badan oo kala duwan oo ururo ah iyadoo laga hadlayo hawlaha kooxaha gaangiska waa: ururada aan faa'iido doonka ahayn, ciidamada ammaanka, ururada dhallinyarada u adeega, magaalada ama dowladda degaanka, bulshooyinka diinta ku salaysan, dowladda gobolka, ganacsiyada degaanka, iyo warbaahinta. Ururadu waxay ka shaqeeyaan qayb kasta oo ka mid ah degaanka, iyadoo culayska u weyn saaray Gresham iyo degaanka Rockwood/Rosewood.

### *La socodka*

- Tiro dhan 80% oo ka mid ah hoggaamiyayaasha bulshada ayaa aaminsan in kooxaha gaangisku ay yihiin dhibaato bulshada ka dhex jirta.

- Sida laga soo xigtay hoggaamiyayaasha bulshada, dhibaatooyinka ugu badan ee ay keenaan kooxaha gaangisku ay yihiin (sida ay isku xigaan) dambiyada rabshadaha wata, cabsida, carqalada qoyska, carqalada dugsiga, dambiyada hubka, dambiyada mukhaadaraadka, wax burburinta/derbi wax ku qoridda, dambiyadda hantiyeed iyo buuqa dadweynaha. Intaasi waxaa dheer, iyadoo shan xubnood oo bulshada ka mid ahi ay tilmaameen tahriibinta bani'aadanka ama dhilaysiga kooxaha gaangiska la xiriira ay yihiin dhibaatooyinka ugu weyn ay keenaan kooxaha gaangisku.

- Hoggaamiyayaasha bulshada ayaa soo xigtay in saboolnimo, lahaanshaha saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku jira kooxaha gaangiska, rabida dareenka ah in la is jecel yahay ama in laga mid yahay, iyo dhibaatooyinka qoys ay yihiin sababaha u weyn ee dadku ugu biiraan kooxaha gaangiska.

- Istaraatajiyada u weyn ee ay hoggaamiyayaasha bulshadu soo jeediyeen si loo yareeyo dhibaatada kooxaha gaangiska ah waxa ay ahaayeen (sida ay iskuga xigaan) shaqooyinka/tababarka shaqo, talo siinta, barnaamijyada madadaalo, barnaamijyada dugsiga, iyo ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta.

- Hoggaamiyayaasha bulshadu waxay bixiyeen warbixinno isku dhafan oo ah haddii ay ku faraxsanaayeen jawaabaha ay (ciidamada ammaanka, hay'addaha adeega bulshada, dugsiyadu, iwm.) ka bixinayaan kooxaha gaangiska iyo inkale. Iyadoo qiyaastii 35% ay waxoogaa ku faraxsanayd, 57% ayaa waxoogaa ku faraxsanaa ama aanan aad ugu faraxsanayn.

### Bulshada Degaanka ku Nool

Inka badan 150 ka tirsan bulshada degaanka ku nool ayaa ka qayb-qaadatay ra'yi ururinta., iyadoo loo qaybiyay laguna buuxiyay internet ahaan iyo nuqullo laga sameeyay labbadoodaba. Bulshada degaanka ku nool ee jawaabaha bixiyay intooda badan waxa ay ahaayeen caddaan (80%) iyo haween (57%). Marka ay

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Kooxaha gaangisku waxay burburiyaan qoysaska waana doqoniimo in lagu biiro sababtoo ah waa dillid aan faa'iido lahayn."*

noqoto xaaladda guur, 40% ayaa guursaday, iyadoo 30% aanay waligood guursan, iyo 21% ka mid ah oo isfuray; inta kale ee hartay waa dad kala maqan ama carmal noqday. Waxay ahayd mid caadi ah in bulshada degaankaasi ku nool ay ahaayeen koox ay da'doodu tahay 50- ilaa 64 jiro (35% oo ahaa dadkii jawaabaha bixiyay). Boqolkiiba shan iyo soddon ka mid ah dadka jawaabaha bixiyay ayaa dhamaystay jaamacad.

*La socodka*

- Inka badan kala bar (65%) oo ka mid ah bulshada degaanka ku nool ayaa sheegay in ayna badbaado ku dareemaynin bulshadooda dhexdiisa marka loo eego sidii ay ahayd labba sano ka hor. Walwalkooda u weyn ee la xiriira bulshadoodu waa (sida ay iskuga xigaan) gadida mukhaadaraadka, burcadnimo/dhaca, hawlaha kooxaha gaangiska, derbi wax ku qorridda, wax burburinta, iyo shaqo la'aanta.

- Inta badan dadka degaanka ku nool (80%) ayaa qaba in ay jiraan kooxo gaangis ah oo bulshadooda ka dhex jira, iyadoo hawlahaasi kooxda gaangisku uu sidii hore ahaa sanadkii la dhaafay (60% oo ahaa dadkii jawaabaha bixiyay); 35% ayaa qaba in ay kordheen, halka 6% ay qabaan in ay hoos u dhacday.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Dadka qaarkii ayaa dareemi waayay badbaado -waayo hore kooxaha gaangisku waxay ahaayeen kuwo daran. Wali way jiraan laakiin sidaasi uma darna. Malaha waxay ku xiran tahay halka aad noloshaha kaga jirto."*

- Bulshada degaanka ku nool ayaa u arka dambiyada mukhaadaraadka la xiriira, cabsida, dambiyada rabshadaha wata, dambiyada hubka, iyo buuqa dadweynaha ay yihiin dhibaatooyinka u weyn ee kooxaha gaangisku u keeneen bulshadooda. Waxay kuwaan u arkaan in ay yihiin dhibaatooyin la xiriira kooxaha gaangiska marka loo eego waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangisku sida ay wax u arkaan.

*Ra'yi Urrurin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "Waa in culayska la saaraa qoysaska. . . qoysaska [ku lug leh] kooxaha gaangiska ayaa dhaqan ahaan ah qoys aan shaqayn."*

- Bulshada degaanka ku nool ayaa soo xigtay in kuwo soo socdaa yihiin sababaha u waaweyn ee keena hawlaha kooxaha gaangiska ah (sida ay isku xigaan): saboolnimo, lahaanshaha saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku jira kooxaha gaangiska, xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee ka soo guuray degaan kale, wax hawlo ah oo aan jirin, rabida dareenka ah in la is jecel yahay ama in laga mid yahay, iyo dhibaatooyinka qoys, caajis, iyo rabitaan awood.

- Istaraatajiyada u weyn ee ay bulshada degaanka ku nooli soo jeediyeen si loo yareeyo dhibaatada kooxaha gaangiska ah waxa ay ahaayeen shaqooyinka/xirfadda shaqo, talo siinta, waxbarasho tayo leh iyo guulaha waxbarasho, barnaamijyada carruurta iyo dhallinyarada, adeegyada caafimaad, illaalin boolis oo dheeraad ah, barnaamijyada/madadaalo, iyo guryo helid tayo leh.

- Bulshada degaanka ku nool ayaa u arka qoyska in ay ahaadaan dadka ma'suuliyadda u weyn leh marka ay noqoto la macaamilka kooxaha gaangiska, iyadoo ay soo raacaan (sida ay isku xigaan) booliska, dugsiga, iyo maxkamadda/nidaamka cadaalada ee dambiyada. Sidoo kale kuwa la soo xigtay waxa ay ahaayeen adeeg bixiyayaasha, kaniisada, bulshada degaanka ku nool, xarumaha bulsho, urrurada xaafaddaha, iyo waaxda caafimaadka.

### Ka Qayb-galayaal aaday Shirkii Dhallinyarada

Wax ka badan 200 oo dhallinyaro ah, dadka waaweyn ee siyaasadda dejiya, iyo hoggaamiyayaasha bulshada ee ka qayb-galayay Shirkii Dhallinyarada Multnomah ayaa ka jawaabay qaybo waaweyn oo ka

mid ah su'aalaha ay ka koobnaayeen ra'yi ururinta tayada leh ee lagu soo koobay warbixintani. Dadka jawaabaha bixiyay da'ahaan aad ayay u kala duwanaayeen, inkastoo intoo badani ay ahaayeen kooxo ay da'doodu tahay 13-15 iyo 16-17 jiro (21% iyo 22% o oo ahaa dadkii jawaabaha bixiyay, hadba sida ay u kala horreeyaan). In ka badan 50% oo ka mid ah dadka waaweyn ee jawaabaha bixiyay ayaa ahaa caddaan; asalka qowmiyaddeed ee dhallinyarada jawaabaha bixisay ayaa aad u kala duwanaa, iyadoo wax ka yar 30% ay caddaan ahaayeen. Haweenka jawaabaha bixiyay ayaa aad uga tiro badnaa ragga jawaabaha bixiyay. Inta badan dadka jawaabaha bixiyay ayaa ka socday Koonfur-bari, Waqooyi-bari, iyo Waqooyiga Portland.

*La socodka*

- Dadka waaweyn ee jawaabaha bixiyay iyo dhallinyarada jawaabaha bixisay labbadooduba (ee ah da'aha 21 jir iyo ka yar) ayaa dambiyada rabshadaha wata iyo cabsida u arka dhibaatooyinka u weyn ee kooxaha gaangisku u keeneen bulshadooda. Dhallinyarada ayagu waxay aqoonsadeen in dagaalada iyo dambiyada mukhaadaraadku ay yihiin dhibaatooyinka u weyn, halka ay dadka waaweyni aqoonsadeen carqalada qoyska iyo dambiyada hubka. Kuwo ka mid ah dhallinyarada wax ka yar (<10%) ayaa sheegay in aanay kooxaha gaangisku dhibaato ku ahayn bulshada dhexdeeda, iyadoo aanu qof weyni bixin jawaabtan oo kale.

- Dadka waaweyn iyo dhallinyarada labbadooduba hawlaha kooxaha gaangiska qayb weyn ayay ka cayaaraan iyagoo raba in la jeclaado/ka mid ahaansho, la soo kulmay saboolnimo, iyo lahaanshaha saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku jira kooxaha gaangiska. Laakiin dhallinyaradu waxay sidoo kale ogaadeen illaalin/awood lahaansho iyo dhibaatooyinka qoys ay yihiin sababaha u weyn (iyagoo mar dambe xaqiiqooyinkan ogaaday in ay yihiin kuwa dhaca marka loo eego sida ay waalidku wax u arkaan).

- Talo siinta iyo shaqooyinka/tababarka shaqo ayaa halka sare ka galay dadka waaweyn iyo dhallinyarada labbadoodaba kaasi oo ah hab lagu yarayn karo dhibaatada kooxaha gaangiska. Sidoo kale dadka waaweyni waxay si joogta u tilmaameen ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta, halka dhallinyaradu ay si joogta ah u tilmaameen barnaamijyada madadaalo. Dadka waaweyn iyo dhallinyarada labbadoodaba waxay talo siinta iyo waxbarasho tayo leh iyo fursaddaha waxbarasho u arkaan in ay lagama maarmaan u yihiin ka hortagga hawlaha kooxaha gaangiska.

> *Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Carruurta bulshadayda ka tirsan maaha in ay noqdaan carruur ka cabsata rabshadaha."*

### Shaqaalaha Dhallinyarada iyo Hay'addaha Dhallinyarada u adeega

Tiro dhan 43 qof oo matala hay'addaha u adeega dhallinyarada ayaah ka qayb-qaatay ra'yi ururinta. Ra'yi ururinta ayaa loo qaybiyay internet ahaan iyadoo dhamaan ka qayb-galayaasha ay ra'yi urrrurinta ka buuxiyeen internet-ka. Wax waxyar ka hooseeya kala bar oo ka mid ah dadkan jawaabaha bixiyay (48%) oo ka mid ahi waxa ay aaminsan yihiin in hawlaha kooxaha gaangisku ay kordhayso, iyadoo 40% ka mid ahi ay qabaan in ay sidoodii hore yihiin, iyo 10% ka mid ah oo qaba in ay hoos u dhacayaan.

### Waalidiinta leh qof Dhallinyaro ah oo Xiriir la leh Kooxaha Gaangiska

Tiro dhan 25 oo ah waalidiinta iyo xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta.

*La socodka*

- Ku dhawaad dhamaan (90%) ka mid ah waalidka/qoyska jawaabaha bixiyay ayaa aaminsan in kooxaha gaangisku ay yihiin dhibaato bulshadooda ka dhex jirta sida xaqiiqo ahaan loogu ogaaday (sida ay isku xigaan) dambiyada rabshadaha wata, cabsida, dambiyada hubka, dambiyada mukhaadaraadka,

burburinta/derbi wax ku qoridda, iyo dambiyadda hantiyeed. Inta u dhaxaysa 55% iyo 85% oo ka mid ah waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayaa laga soo xigtay dareenkan ay qabaan ama hawlahani yihiin kuwo tilmaamaya jiritaanka hawlaha kooxaha gaangiska.

- Marka la barbardhigo hoggaamiyayaasha bulshada, kuwo badan oo ka mid ah waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayay u muuqdaan dhibaatooyinka la xiriira kooxaha gaangiska ee bulshada ka dhex jira iyagoo qaba in wax laga qabto si loo yareeyo hawlaha kooxaha gaangiska.

- Wax ka yar kala bar oo ka mid ah waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayaa u arka in kooxaha gaangisku ay qayb ka geysanayaan dugsiga ama carqalada qoyska ama ay sababayaan buuq dadweyne.

- Waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ayaa qaba sababaha u weyn ee keena hawlaha kooxaha gaangisku ay noqdaan (sida ay isku xigaan) lahaanshaha saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku jira kooxaha gaangiska, saboolnimo, dhibaatooyin qoys, xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska oo u soo guuraya bulshada iyagoo ka soo guuraya meelo kale, caajis, illaalin, dhibaatooyin dugsi, rabida dareenka ah in la is jecel yahay ama in laga mid yahay, rabitaan awood, ama booliska oo eedayn dhusha ka saara.

- Istaraatajiyada u weyn ee waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys oo leh qof dhallinyaro ah oo xiriir la leh kooxaha gaangiska ee la soo xigtay si loo yareeyo dhibaatada kooxaha gaangiska ah waa (sida ay iskugu xigaan) ka qayb-qaadasho dheeraadka oo waalidka la xiriirta, shaqooyinka/tababarka shaqo, barnaamijyada dugsiga, iyo barnaamijyada madadaalo.

- Iyadoo qiyaastii 30% oo ka mid ah waalidiinta/xubnaha ka tirsan qoys ay qabaan in ilmaha ay dhalleen uu khatar ugu sugan yahay in kuu ka mid noqdo kooxaha gaangiska, iyadoo 45% ayna qabin in ilmaha ay dhalleen uuna khatar ugu sugnayn.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Kooxaha gaangisku waxay carruurrta ka joojiyaan in ay waxbarashadooda sii wataan"*

### Shaqaalaha Dugsiga

Toddoba xubnood o ka tirsan shaqaalaha dugsiga—oo dhamaantood ka socda Maamulka iyo Ganacsiga (LEP) Dugsiga Sare oo Gaar ah — ayaa buuxiyay ra'yi ururinta, oo nuqullo laga sameeyay.

#### *La socodka*

- Iyadoo qiyaastii 40% oo ka mid ah shaqaalaha dugsiga ee jawaabaha bixiyay ay sheegeen in aanay dhibaato la xiriirta kooxaga gaangisku kajirn dugsigooda, 30% oo ka mid ah xubnaha ka tirsan shaqaalaha dugsiga ayaa qaba in ay jirto dhibaato, markii ay u fiirsadeen taasi oo la xiriirta derbi wax ku qoridda gudaha iyo hareeraha dugsiga.

- Shaqaalaha dugsigu ma qabaan in hawlaha kooxaha gaangisku ay kordhayaan. Iyadoo ay taasi jirto ayaa hadana, saddex meelood labba meel oo ka mid ah (66%) ay aaminsan yihiin in hawlaha kooxaha gaangisku ay hoos u dhacayaan, halka inta kale ee soo hartay oo ah (33%) ay aaminsan yihiin in ay sideedii hore tahay.

- Shaqaalaha dugsiga ayaa bixiyay jawaabo kala duwan oo la xiriira goorta iyo marka ay dhacaan hawlaha kooxaha gaangisku, nooca dhibaatooyin ee xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ay u keenaan gudaha iyo hareeraha dugsiga (ee aan ka ahayn derbi wax ku qoridda), iyo arrimaha qaybta ka geysta hawlaha kooxaha gaangiska. Ma jirin isku xirnaan ka dhaxaysay jawaabahan la bixiyay.

### Ardayda

Inka badan 200 oo arday, oo ka kala socota afar dugsi oo kuwa beddelka ah (LEP, POIC Bari, POIC Waqooyi, iyo Alpha), ayaa ka qayb-qaatay ra'yi ururinta. Inta badan ardaydu da'ahaan (72%) waxay ahaayeen 16 iyo 18 jiro. Faraqa u dhexeeya ragga marka loo eego gabdhaha ardayda ah wuxuu ahaa 54% ilaa 43%. Inka badan kala bar oo ardayda ka mid ah (52%) ayaa isku aqoonsaday caddaan, 39% ka mid ah ayaa isku aqoonsaday Maraykanka Madow, iyadoo 16% ka mid ahi isku aqoonadeen in ay yihiin Laatiino, Hisbaanik, ama Isbaanish. Ardayda qaar qiyaastii (18%) ayaa sheegay in ay Isbaanish ku hadlaan marka ay guriga joogaan. Afar meelood saddex meel (75%) ayaa qiyaasta la nool hooyooyinkood. Iyadoo 40% oo ka mid ah ardaydu, sheegeen in aabo joogo gurigooda.

Tacliin ahaan, qiyaastii 55% oo ka mid ah ardayda jawaabaha bixisay ayaa sheegay in ay inta badan keenaan darajada B iyo C marka ay dugsiga joogaan. Inta u dhaxaysa 33% iyo 41% ayaa isku tilmaamay in ay "mararka qaarkood"xiisaynayaan dugsiga sidoo kalena dareemayaan in qiimo ku leeyihiin halkaasi.

#### *La socodka*

- Inta badan ardayda qiyaastii (75% ama ka badan) ayaa sida caadiga ah ammaan ku dareema dugsiga, marka ay aadayaan ama ka soo laabanayaan dugsiga, iyo xaafaddahooda. Si kastaba ha ahaatee, qiyaastii 10% oo ka mid ah ardayda ayaa marar dhif ah aan ammaan ku dareemin dugsiga ama aan waligood ammaan ku dareemin dugsiga, iyadoo 15% ka mid ahi aanay ammaan ku dareemin xaafaddahooda.

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Dhallinyarada isku xaafadda la isla degan yahay ma ka qayb-qaateen kulanno wanaagsan."*

- Inta badan ardaydu waxay sheegeen in saaxiibkooda ugu dhowi aanay ku lug yeelan falal khatar ah. Ardayda sheegtay in in saaxiibkooda ugu dhowi uu ku lug yeeshay falal khatar ah, ayaa sidoo kale sheegay in affartooda saaxiib ee kala ay sidaasoo kale yihiin. Falalka khatarta ee ugu badan ee ka dhex dhaca saaxiibada aadka isugu dhowi waa:
    - gadida mukhaadaraadka sharci darada ah
    - firfircoonaanta la xiriirta galmada
    - cabida aalkolada oo joogta ah
    - xatooyada

- Falalka khatarta aan badnayn ee ka dhex dhaca saaxiibada aadka isugu dhowi waa:
    - iska joojinta aadida dugsiga
    - ka tegidda dugsiga
    - qaadashada hubka loo qaadanayo dugsiga
    - xabsi is geynta
    - ahaanshaha xubin ka tirsan kooxaha gaangiska

- Kala bar ardaydu (52%) waxay sheegeen in aanay ogayn in kooxo gaangis ahi ay ka jiraan dugsigooda iyo in kale. Inta soo hartay waxa u kala qaybsameen si isku mid ah iyadoo in ay kooxo gaangis ahi jiraan ay aaminsan yihiin (24%) iyo kuwa aaminsan in aanay jirin oo ah (26%).

### Shakhsiyaadka ku Lug leh Kooxaha Gaangiska

Tiro dhan 80 oo ka mid ah shakhsiyaadka ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa ka qayb-qaatay wareysiyo fool ka fool ah oo ay sameeyeen shaqaalaha caafimaadka bulshada oo ka socda Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah iyo shaqaale ka socda Maamulka Dhalinyarada Oregon iyo Xafiiska Ammaanka Degaanka Multnomah. Ujeedada laga lahaa wareysiyadu ma ahayn in la helo macmuulaadka ku saabsan hawlaha dambiyada ee laakiin waxa ay ahayd in wax laga ogaado shakhsiyaadka sida tooska ah, ula soo dhaqmay kooxaha gaangiska. Si loo ogaado macnaha ay kooxaha gaangisku ugu fadhiyaan iyo wixii ay soo jeediyeen in la qabto si loo yareeyo ka mid noqoshada kooxaha gaangiska iyo fal dambiyeedka ka jira bulshadeena dhexdiisa. Iyadoo qiimeyntani dhanka caafimaadka dadweynaha laga eegayo, waxaan wareysiyada qaadnay iyadoo maanka lagu hayo in, inkastoo ay jiraan dhaqano xun oo la xiriira kooxaha gaangiska ee keena buuxinta baahiyaha

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "Waxaan u baahanahay fursaddo waxbarasho oo dheeraad ah, fursaddo shaqo oo dheeraad ah, kulanka dugsiga ka dib oo dheeraad ah- wakhti qaabaysan oo badan.*

dhalinyarada ay noloshooda la soo deristay khatar aad u weyni ee sidoo kalena raadinaya kalsooni ay helaan, xiriir ay yeeshaan, iyo daryeelka ay dhibaatadu ka haysato in ay helaan iyagoo adeegsanaya qaab bulsheed.

Mudadii lagu jiray wareysiga, inta badan dadka la wareystay qiyaastii (75%) waxay ku noolaayeen bulshada dhexdeeda, iyadoo 25% ay ku jireen xuramaha dhaqan-calinta ee lagu hayo dhallinyarada. Ragga la wareystay ayaa tiro ahaan aad uga badnaa haweenka (82% ilaa 18%), iyadoo da'ada kooxda u badani ay ahaayeen 18 ilaa 25 jiro taasi oo ah(45% dadkii la wareystay). Tiro dhan 92% oo ka mid ah dadkii la wareystay ayaanan ahayd caddaan, iyadoo Maraykanka Madow iyo Hisbaanigu ay ka dhigtay in ay asal ahaan/qowmiyad ahaanba noqdaan kooxaha u badan (58% iyo 19% dadka jawaabaha bixiyay, hadba sida ay u kala horreeyaan). Qiyaastii 11% dadka la wareystay, Isbaanish ayaa ah luqadda ay isticmaalaan marka ay guriga joogaan.

*La socodka—Qoyska, Shaqada, iyo Dugsiga*

- Inta badan dadkii la wareystay (74%) waligood ma guursan. Tiro dhan 48 oo ah dadkii la wareystay—60%—ayaa tilmaamay in ay carruur leeyihiin.
- Inta badan dadkii la wareystay (89%) ayaa tilmaamay in xubin ka tirsan qoysku uu ku lug lahaa kooxaha gaangiska, laakiin 96% ay sheegeen in aanay rabin in carruurtoodu noqdaan xubno ka tirsan kooxaha gaangiska.
- Saddex meelood labba meel (53 oo iyaga ka mid ah) ayaa sheegay in aanay hada wax shaqo ah haysanin.
- Qiyaasaha xisaabeed ee la xiriira waayo-aragnimada dugsi waa sida soo socota:
  - 32% oo ka mid ah dadka la wareystay ayaa hada aadaya dugsi.
  - 53% ayay jirtay wakhti ay dugsiga iskaga tageen.
  - 83% ayay jirtay wakhti laga joojiyay ama laga cayriyay dugsiga. Dadka la wareystay, 60% ka mid ah ayaa tilmaamay in laga cayrshay iyagoo dagaalamay.
  - 70% oo ka mid ah ayaa tilmaamay in ay danaynayaan in ay dugsiga ku laabtaan. Dadka la wareystay, inka badan kala bar (52%) ayaa daneeyay aadida jaamacad.
- Sannadkii la soo dhaafay, tiro ka mid ah dadka la wareystay ayaa goob joog ka ahaa hawlaha la xiriira kooxaha gaangiska—sida rabshado—ka dhacay dugsiga . Ta inta badan aadka loogu fiirsaday ee hawlaha la xiriira kooxaha gaangisku waxay ahaayeen xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee dugsiga jooga, xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska ee gadaya mukhaadaraad, dagaallo u dhexeeya xubnaha ka tirsan kooxo gaangis oo kala duwan, iyo cabsi gelin ay wadaan kooxaha gaangisku.

*La socodka—Badbaadada Bulshada, Dhibaatooyinka Bulsho, iyo U joogidda Rabshado*

- Qiyaastii saddex meelood labba meel dadkii la wareystay (51 oo iyaga ka mid ah, ama 64%) ayaa sheegay in ay jiraan degaano bulshadooda ka tirsan oo ay dareemeen in la bar-tilmaameed saday ama khatar ku sugan yihiin marka ay lugaynayaan.
- Qiyaastii saddex meelood hal meel (27 oo iyaga ka mid ah, ama 36%) ayaa kuwo soo socda ku tilmaamay in ay yihiin dhibaatooyinka bulshadooda ka dhex jira:
  - Isticmaalka aalkolada—dhibaato"aad halis u ah"
  - Iska hor imaadka kooxaha gaangiska—dhibaato "halis ah"
- Sagaal iyo labbaatan ka mid ah dadkii la wareystay (39%) waxay tilmaameen in wax burburinta/derbi wax ku qoriddu tahay dhibaato "yar" oo bulshadooda ka dhex jirta.

- Dadka la wareystay ayaa goob joog ka ahaa noocyo kala duwan oo la xiriira hawlaha kooxaha gaangiska, sida rabshado, kuwaasi oo dhacay sanadkii la soo dhaafay. Hawlaha sida joogtada ah loola socday waxaa ka mid ah kuwa soo socda:
    - Xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska oo gadaya mukhaadaraad—waxaa joob joog ka ahaa 25 ka mid dadkii la wareystay (34%) taasi oo ka badan 26 jeer sanadkii la soo dhaafay.
    - Dagaalada u dhexeeya xubnaha ka tirsan kooxo gaangis oo kala duwan, waxaa joob joog ka ahaa 19 ka mid ah dadkii la wareystay (26%) taasi oo ka badan 26 jeer sanadkii la soo dhaafay.
- Kuwa aan sida joogtada ah loola socon waxa ay ahaayeen tooshada iyadoo gaariga la saaran yahay la istoogto iyo dagaalada u dhexeeyay xubnaha ka wada tirsan isla hal koox oo gaangiska ah:
    - 30 ka mid ah dadkii la wareystay (42%) sanadkii la soo dhaafay goob joog kama ahayn tooshada iyadoo gaariga la saaran yahay la istoogto.
    - 22 dadkii la wareystay (31%) ka mid ah dadkii la wareystay goob joog kama ahayn dagaalada u dhexeeyay xubnaha ka wada tirsan isla hal koox oo gaangiska ah.

*La socodka—Kooxaha Gaangiska iyo Bulshada*

- Marka la qeexayo sida ay kooxaha gaangisku saameynta ugu yeeshaan bulshadooda, 33% ka mid ah dadkii la wareystay ayaa sheegay in kooxaha gaangisku ay hoos u dhigaan ammaanka bulshada, iyadoo 43% ay tilmaameen in kooxaha gaangisku ay saameyn xun ku yeeshaan bulshada:

- Dadka la wareystay ayaa kuwo soo socda u aqoonsaday saddexda sababood ee weyn ee keena dhibaatooyinka la xiriira kooxaha gaangiska ee bulshadooda ka dhex jira:

1. Qoyska ama saaxiibo ka tirsan kooxaha gaangiska (68%)
2. Saboolnimo (61%)
3. Dhibaatooyin qoys (44%)

## Xogta Ilaha Bulshada

Degaanka Multnomah waxay hodan ku tahay lahaanshaha adeegyo kala duwan oo ay heli karaan dhallinyarada iyo qoysaskoodu. Iyadoo la isticmaalayo dhowr ka mid ah ilaha kala duwan ee ka jira, waxaan ogaanay 469 barnaamijyo oo ka jira in the Degaanka Multnomah oo adeegyo siiya dhallinyarada iyo qoyska; barnaamijyadani waxaa maamula 151 oo ah ururada aan faa'iido doonka ahayn ama ururada dowliga ah oo kala duwan.[7] Email ku saabsan ra'yi ururinta ayaa loo diray dhamaan barnaamijyada codsanaya macluumaadka dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadooda. Dadka ra'yi ururinta laga qaaday, 260 (55%) ka mid ah ayay jawaabtoodu noqotay in ay bixiyaan macluumaad faahfaahsan. Baarintaanka taasi soo raacdaa waxay ku salaysan tahay macluumaad ay hay'adduhu iskood u soo sheegeen kuwaasi oo ay ka mid yihiin xog laga helay 260 hay'addood oo codsigayagii kaga jawaabay in ay bixiyaan macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan barnaamijyadooda.

Inkastoo Degaanka Multnomah uu bixiyo adeegyo loogu talagalay dhallinyarada iyo qoysaskooda, kaliya 22 barnaamij oo u dhigma (5%) ayaa si gaar ah culayska u saara u adeega xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska. Waxaan u aragnaa barnaamijyadani in ay yihiin barnaamijyo u gaar ah kooxaha gaangiska.

*"Waxaan u baahanahay ka qayb-qaadasho dheeraad ah iyo hadal yar. Tala siinta dadka isku faca ah iyo waxbarashada."*

[7] Degmada 2 / Kooxda Hawl Fulinta ee Rabshadaha Kooxaha Gaangiska – Liiska Adeegyada, Barnaamijyada Adeeg ee loogu talagalay Rabshadaha Dhallinyarada & Kooxaha Gaangiska ee Multnomah County – Guddiga Hagidda Rabshadaha Dhallinyarada & Kooxaha Gaangiska, Buuga Tilmaamaha Degmada ee Street Roots Rose – Adeegyada Dhallinyarada, Liiska 5 Istaraatajiyadood ee Muhiimka ah ee Gresham, Tala siiyayaasha Oregon

| Xogta | Lambarka/Qiyaasta boqolkiiba |
|---|---|
| Tirada guud ee barnaamijyada la aqoonsaday | 469 |
| Barnaamijyada kasoo jawaabay ra'yi ururintii | 260 (55%) |

*Ra'yi Ururin laga qaaday Hoggaamiye ka tirsan Bulshada oo jawaab bixinaya ayaa yiri: "[waxaan u baahanahay] si aan uga qayb-galino codadka shakhsiyaadka iyo qoysaska ay saameeyeen kooxaha gaangisku iyo hawlaha kooxaha gaangisku"*

Waxaa sidoo kale jira barnaamijyo aanan kaliya si gaar ah ugu koobnayn in ay culays saaraan u adeega xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska, laakiin shaqaalahoodu ay waayo-aragnimo u leeyihiin la shaqaynta kooxaha dhallinyarada ah ee gaangiska ku lugta leh. Tani waa sida arrinku u yahay 56% oo ka mid ah barnaamijyada bixiyay macluumaad ku saabsan shaqaalahooda. Qiyaastii saddex meelood hal meel oo ka mid ah dhamaan barnaamijyadii soo jawaabay ayaa ah kuwo sameeya qiimeyn dhanka khataraha ah kuwaasi oo ay ka mid yihiin macluumaadka ku saabsan ku lug lahaanshaha kooxaha gaangiska ah. Barnaamijyada isku aqoonsan in ay yihiin kuwo "culayska saara xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska," ee lah shaqaale "la soo kulmay u adeegida xubnaha ka tirsan kooxaha gaangiska," ama "sameeya qiimeyn dhanka khataraha ah oo ay ka mid tahay ku lug lahaanshaha kooxaha gaangiska" ayaa loo aqoonsaday in ay yihiin barnaamijyada jawaabaha ka bixiya kooxaha gaangiska. Barnaamijyada jawaabaha ka bixiya kooxaha gaangiska ayaa ah kuwo dhaqan-geliya istaraatajiyo kala duwan, kuwaasi ka bilaabma ka hortagga socdana ilaa dib u soo gelidda, iyadoo ka hortagga iyo waxka qabashadu ay yihiin nooca istaraatajiyadeed inta badan la sameeyo. Kuwa ka mid ah barnaamijyada loogu tala galay kooxaha gaangisku, waxaa jiray culays badan oo la saaray cadaadiska iyo dib u soo gelidda.

Barnaamijyada waxaa lagu daray liiska adeegyada siiya dhallinyarada da'aha kala duwan leh, laga soo bilaabo dhallashada ilaa inta laga weynaanayo. Si kastaba ha ahaatee, tirada ugu badan ee barnaamijyadu waxay beegsadaan dhallinyarada da'ada dhexdhexaadka ah leh iyo dhallinyarada gaartay wakhtigii dugsiga sare la aadayay. Barnaamijyada jawaabaha ka bixiya kooxaha gaangiska ayay u badan tahay in ay culayska saaraan carruurta iyo dhallinyarada marka loo eego barnaamijyada kale.

Ku dhawaad 75% dhamaan barnaamijyadii soo jawaabay waxay tilmaameen in aanay hada "buuxin." Barnaamij kale ee soo haray 13% ayaa sharaxay in barnaamijku noqdo mid buuxa ay kala duwan tahay iyadoo ay ku xiran tahay waxyaalaha ay ka midka yihiin sida wakhtiga lagu jiro sanadka, tirada shaqaalaha, iyo ilaha dhaqaalaha. Kuwa ka mid ah barnaamijyada loogu tala galay kooxaha gaangisku, waxaa jiray barnaamijyo intii hore ka yar oo tilmaamay in ay "buuxaan." Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in la ogaado in adeegyo badan oo ay bixiyeen ciidamada ammaanka iyo hay'addaha cadaaladda dembiyadda ay awooddi waayaan in ay xaddidaan tirada dadka ay u adeegaan. Sidaa darteed, barnaamijyada noocan oo kale ah waligood lama tixgelinayo in ay yihiin kuwo "buuxa."

Barnaamijyadu guud ahaan waxay ku tiirsan yihiin ila dhaqaale oo kale duwan:

- 37% oo ka mid ah ayaa hela dhaqaale gaar ah (sida caawimooyin, ururada degaanka ee qoyska/gaarka ah, ururada qaranka ee gaarka ah).
- 56% oo ka mid ah ayaa helo dhaqaalaha degaanka (sida dugsiyada degmada,

*Shakhsi ku lug leh kooxaha gaangiska ayaa yiri: "[Dadka saameyn wanaagsan noloshayda ku yeesha] waxaa ka mid ah ma'uulkayga dhaqan-celinta, macalinkayga, iyo la taliyahayga."*

magaalooyinka, iyo dhaqaalaha guud ee degaanka).

- 38% oo ka mid ah ayaa hela shaqaalaha gobolka (sida Dhaqaalaha Guud ee Gobolka, Qorshaha Caafimaadka Oregon).
- 33% oo ka mid ah ayaa hela dhaqaalaha dowladda federaalka (sida lacago, Medicaid).

*"Hubi in codadkeena la maqlo"*

Barnaamijyada loogu tala galay kooxaha gaangisku waxay inta badan ku tiirsan yihiin dhaqaalaha degaanka iyo gobolka. Hal barnaamij oo kaliya oo loogu tala galay kooxaha gaangiska ayaa tilmaamay in uu dhaqaale ka helo meel gaar ah, iyadoo hal barnaamij oo kaliya uu tilmaamay in uu helo dhaqaalaha dowladda federaalka ah si uu taageero barnaamijkooda. Degaanka Multnomah iyo Magaalada Portland waa kuwo bixiya dhaqaalaha u badan ee barnaamijyada loogu tala galay adeegyada kooxaha gaangiska.

Iyadoo la isbarbar dhigayo barnaamijyadii degaanka khariidada loo sameeyay laga soo bilaabo 2009-kii ilaa 2014-kii ayaa tilmaamay in qaybinta adeegyadu ay waxoogaa isbeddashay , iyadoo adeegyada ka jira Bariga Portland iyo Gresham ay ahaayeen kuwo aad u baahsan 2014-kii.

## Gunaanad

Qiimeyntani ma bixinayso wax talo soo jeedin ah oo ku saabsan xal u helidda hawlaha la xiriira kooxaha gaangiska ah ee bulshada ka dhex jira. Kaliya waxay ogaanaysaa sida ay hada tahay hawshaasi iyadoo bixinaysa siyaasad loogu gudbayo Wejiga 2 ee Habka Buuxa ee Kooxaha Gaangiska ee OJJDP: Dhaqan-gelinta Qorshaha.

Buuxinta qiimeyntani, Degaanka Multnomah waxay bilowday qorshe muhiim ah.  Ogaanshaha sida ay hada tahay xaaladda hada taagan ee dambiyada la xiriira kooxaha gaangiska iyo fikraddaha ay bulshadu ka aaminsan yihiin arrimahani waxay keentay bixinta xog qani ah oo la helo. Sidoo kale waxay bilowday wada shaqayn cusub oo dhex marta xubnaha ka tirsan bulshada ee ay sida shakhsiga ah u saameeyeen arrimahani. Waxaa looga baahan yahay kooxaha ay wada shaqayntu ka dhaxayso LPSCC ay xaqiijiyaan in Wejiga 2 ee hawshani uu halkiisii ka wado horumarka laga gaadhay Wejigii 1 iyadoo si dheeraad ah loo sii ogaanayo xogta qiimaha leh, lana ixtiraamayo tallooyinka iyo xiriirada lala sameeyay xubnaha bulshada ka tirsan ee ka qayb-qaadanaya.

## Codadka Dadka ay Saameeyeen Kooxaha Gaangisku

Qaybtan waxaa la socda sheekooyinka gaarka ah ee laga helay dadka ay saameynta ku yeesheen kooxaha gaangisku. Waxaan si daacad ah ugu mahadcelinaynaa dadkani kaasi oo la xiriira rabitaankooda ay sheekooyinkan la qaybsadeen warbaxintani anagoo ku rajo weyn in hadaladoodu ay taageero ka geysan doonaan in uu dadaalkani hore u sii socdo.

### Sang ayaa yiri …

*"Intaan ka xasuusto waxaa markasta jiray in aan xaqiiqsanaa jiritaanka kooxo gaangiska ah iyo hawlo la xiriira kooxaha gaangiska. Xubno ka tirsan qoyskayga kamay xishoon kooxaha gaangiska marka ka aan ka soo ag dhawaado. Intaasi waxaa dheer, in ku dhallashada aan ku dhashay iyo ku koridda aan ku karay Bariga Oakland, California, ayna iga caawin in aan si kale u fakaro. Wakhtigaasi, marka loo eego waxyaalaha kale, goobta aan ku noolaa waxay ahayd meel ay saboolnimo ku dhufatay, meel ay kooxaha gaangisku ka buuxaan, oo uu mukhaadaraadku ku baahsan yahay. Ku noolaanshaha halka aan ku noolaa, markaan yaraa wax badan baa iga soo gaaray meelaha ii dhawaa. Iyadoo ay la xiriirto waayo-aragnimadayda iyo jiritaan la'aanta ogaanshaha wixii ka baxsan xaafaddayda ee aan ka ahayn dhaqanka xun ee ka jira xaafaddayda, kama warqabin inay wax kale jiraan. Waxay qayb ka ahayd nolol maalmeedkayga, iyo guud ahaan noloshayda, taasi marka la eego.*

*“Waxaan ku koray guri abaarman oo deganaayeen hooyaday, ilma cusub oo dhashay oo aan walaalo nahay, ayeeydeey, eedaday, iyo si caadiga ah qof deganaa qol oo naga caawinayay dhanka ijaarka. Hoostayada waxaa ku noolaa xubnaha kale ee ka tirsan qaraabadayda. Inta badan ma jirin hal guri oo lagu wada noolaa sababtoo ah xubnaha qoyskayga ka tirsan intooda badani waxay ka shaqaynayeen shaqooyin kala duwan iyagoo shaqaynayay saacaddo badan si ay u daboolaan nolol maalmeedkooda. Sidaa darteed inta badan maalmahayga waxaan ku qaatay in aan ku cayaaro jidadka anigoo la cayaaraha carruuraha xaafadda. Marka aanan la cayaaraynin carruuraha xaafadda, wakhtigaygu wuxuu ahaa mid aan ku mashquulsanahay arragtida hawlaha sharci darrada ah ee dadka ii dhawaa. Markaan gaaray lix jir, waxaa si aad ah ii saameeyay xubnaha ka tirsan qoyska ee aan damiirka lahayn iyo degaanka aan ku noolaa. Waxaan bilaabay in aan ka qayb-qaato waxyaalaha aan wanaaga u arkayay ee waafaqsanaa dhaqanka kooxaha gaangiska ah. Aniga oo aad u yaraa oo waxba aan kala ogayn, iyo iyadoo si joogta uu ii soo gaarayay dhaqanka kooxaha gaangisku, ugu dambayn waxay noqotay qayb iga mid ah. Waxaan tan ogaaday markii aan bilaabay in aan si tartiib tartiib ah sameeyo hab-dhaqankani*

*“Ka dib markaan u soo guuray Portland, Oregon, anigoo sideed jir ah, iyo markii aan marar badan oo aan ku guuldaraystay isku dayay in aad si caadi ah u dhexgalo dhaqanka ka baxsan kooxaha gaangiska iyo fal dambiyeedyada, waxaan arkoodaay in meel aan u maleeyay in aan ka tirsanahay. Taani may dhicin ilaa aan ka gaarayay saddex iyo tobban jir oo aan bilaabay in ay isoo jiitaan waxkasta oo xubnaha qoyskayga ka tirsan ee iga soo horreeyay iyo degaankii carruurnimadu ay ii muujiyeen. Waxyar ka dib, waxaan bilaabay in aan galo kooxaha gaangiska ee ay tiro ka tirsan qoyskaygu ay xiriirka la lahaayeen. Ku lug lahaanshahayga kooxaha gaangisku wuxuu ii horseeday in si aad ah aqoon ugu yeesho hubka, mukhaadaraadka, iyo rabshahada. Isla markiiba waxaan arkay awoodda nololeed iyo dhimasho ee hubka iyo mukhaadaraadku ay ku lahaayeen dadka ii dhawaa. Waxaan u soo joogay dad badan oo noloshoodii lumiyay taasi oo ay sabab u ahayd nolosha kooxaha gaangiska iyo hawlaha la xiriira mukhaadaraadka, dadkaasi kuwo ka mid ah oo ahaa kuwii aan tixgelinta u hayay.*

*“Ku lug lahaanshahayga kooxaha gaangisku iyo lacagta aan waxaan iibino ka helayno waxay saameysay dhan kasta oo nolosha ka mid ah. Waxaa jiray mar aan iska fogaynayay qoyskayga oo aan ka doorbidayay in aan la joogo qoyskayga kooxaha gaangiska ee cusub. Cudur daar ayaan u yeelay tallaabooyinka aan qaaday anigoo sabab uga dhigaya in qoyskayga kooxaha gaangisku ay ahaayeen kuwa kaliya ee i fahamsan. Taasi awgeed, qoyskii i dhalay may rabin in ay iga soo ag dhawaadaan iyagoo aan taasi qarin. Waan ka xishooday dhamaan waxyaalaha xun xun ee aan samaynayay. Hooyadaydii i dhashay way garan way si ay iga yeesho. Markasta oo ay i soo fiiriso, waxaan arkayay dhaawaca iyo rajo la’aanta ka muuqatay indhaheeda. Anigoo marar badan ku celceliyay, in aan iska indho tiro oohinteeda. Niyad ahaan waan ogaa in aad luminayay dadkayga iyo waxyaalaha aan runtii tixgelinta u hayay.*

*“Waxbarashadaydii ayaa joogsatay oo la waayay. Waan ka quustay waxbarashada markii aan awooddi waayay in aan ku dheeli-tiro nolasha kooxaha gaangiska iyo lacagta aan waxaan iibino ka helayno ee aan sida aadka ah wakhtigayga ugu hibeeyay. Waxaan dugsiga ka tegay markii aan ahaa fasalka 9, sanadkii aan cusbaa. Waxaan soo goobaabiyay waxbarashadii, oo ahayd albaabka laga galo nolol guul leh. Aadid la’aanta dugsiga, iyo or-oradka jidadka halkii aan dugsiga ka aadi lahaa, waxay markiiba ii keentay in aan si joogto ah aniga iyo sharciga iskaga hor imaano. Xabsiga aan marna la gelayay marna ka soo baxayay, taasi oo aan dhamaad lahayn. Waxaan dhibaato ugu soo jiidayay bulshada hab aanan waligey ka fakarin. Waxay saameeyey cidkasta oo ka mid ah: qoyska, saaxiibada, deriska, bulshada, iyo dadkii aan tixgelinta u hayay. Ka dibna wuxuu arrinku muuqday in uu qofkastaa iska kay fogaynayay. Waxaan dareemayay in aan ahaa qof aan meelna haysan oo aan la rabin oo aan lahayn qof uu dhankiisa u leexdo, gaar ahaan markaan u baahnaa qof wax ii tilmaama.*

*“Noloshayda dhamaan waxaan doortay in aan wax xun sameeyo, sidaa darteed taasi waxa ay ahayd waxaan raadiyay si aan kalsooni u helo. Waxaan u leexday dhanka mukhaadaraadka si uu u buuxiyo meesha bannaan, kaasi oo muddo gaaban hoos u dhigay kelinamadii iyo rajo la’aantii aan qabay, dareenkaasi oo markale soo laabta marka saameynta mukhaadaraadku aanay jirin. Sababtaasi darteed, ayaan si aanan waxba u kala go’aan mukhaaraadka u isticmaalayay markasta oo ay dareennadaasi*

*soo laabtaan. Sida aan u arkayay waxkasta oo nolosha la xiriiraa wuxuu ahaa mid xun. Waxba maan kala jeclayn sidoo kalena tixgelin ma siinaynin nolosha dadka kale. Faraha ayay ka sii baxday anigoo bilaabay luminta xiisaha aan u qabo hawlaha la xiriira nolol maalmeedkayga. Wax hada ka dib farxad i gelinaayay ma jirin.*

*"Ka dib, markii la ii xiray dambigii aan galay, wixii xornimo yar ahayd ee aan haystay waa la waayay oo maxbuusnimadii ayaa la sii adkeeyay taasi oo iga raysay. Waxkasta waa la iga xayuubiyay, waxa kaliya oo ii haray waa gol qabow badan. Maalmo iyo habbeeno aan dhamaanaynin ayaan naftayda la showray anigoo is leh, 'Halkeey wax ka qaldameen?'*

*"Xasuus xanuun badan ka dib, waxaan garwaaqsaday in la gaaray wakhtigii ay xaaladdu isbeddeli lahayd. Habka nololeed ee aan ku noolaa ma ahayn mid macno leh marka loo eego waxaan gayaysiiyay qofkasta iyo naftayda. Qofna uma qalmaynin dhaawaca aan soo gaarsiiyay dadka aan jeclahay, dadka bulshada ka tirsan, iyo naftaydaba. Halkii aan ka qoomamayn lahaa, naftayda ayaan awood u yeelay si aan isbeddel u sameeyo kaasi oo ku salaysnaa damiir wanaag aaminsanaan, iyo sabab u yeelid. Tani waxaan u arkay in ay tahay fursad bilow cusub ah. Waan garanayay in tani ahayd fursadaydii aan wax ku saxayay.*

*"Iyadoo la isticmaalayo taageerada qoyska, saaxiibada iyo dad la taliyayaal ah, waxaa la i baray qiimaha neefsasho kasta oo nolosha la xiriirtaa ay leedahay iyo macnaha ay leedahay in xor la ahaado: awoodida gaarida go'aano kuu gaar ah, qiimeynta xiriirka dadka, iyo qabashada wax la qabanayo iyadoo laga eegayo dhanka fiican, iyo in tusaale wanaagsan loo noqdo dadka kuu dhow. Waxaan awooday in aan naftayda ka xorreeyo kooxaha gaangiska ah markii aan xaqiiqsaday in aan haysto fursad.*

*"Anigoo hada taa ka fakara, ma qabo in habka nololeed ee kooxaha gaangisku uu gacan weyn igu lahaa marka loo eego gacanta aan ku leeyahay habka nololeed. Waxaan u baahnaa waxay ahayd in aan dib u eego wixii isoo maray, aaminaad iyo in aan si kale wax u arko. Waxaa keenay geesinimo iyo awood si looga tego. Mararka qaarkood, wax hal ka badan hal ayay naftooda u samayn karaan. Waa taasi sababta aan u mahadinayo haysashada dad i caawiya inta hawshu socoto.*

*"Waxaan dareensanahay, in taageerada saxda ah iyo isku day aan hagar lahayn, aan jebin karno awoodda kooxaha gaangiska ay ku leeyihiin nolosha dadka. Waxaa suuragal ah in qofku mararka qaarkood ka cabsado in uu hadlo, in uu ogaado nolosha dhanka kale ka jirta, ee aanay waligood ogayn in uu wanaag jiro si ay wanaag kale u sameeyeen. Si kastaba ha ahaatee, bulsho ahaan waa in aan qofkaasi siinaa fursad taageero wadata awood uu wax ku qabsan karo. Waa in aan u taageernaa hab joogto ah, oo laakiin aan ahayn muquunin. Haddii aanay jiri lahayn dad noloshayda iga taageeray in aan aqoonsado sidoo kalena toosiyo kartidayda. Waxaan u malayn lahaa in noloshaasi kooxaha gaangisku tahay ta kaliya ee jirta. Waxaan ahaa qof xabsi ku jira ka hor intii aanan xabsiga runta ah cagta soo gelinin. Si kastaba ha ahaatee, kartida aan isku yeelay ayaa siisay geesinimada in taasi maskaxdayda ka saaro. Markii aan sidaasi yeelay, waxkasta oo aan soo maray ma noqon kuwo mustaqbalkayga qeexa. Waxaa bilaambay in albaabadii fursadduhu ii furmaan. Waxaan ahaa darawalka kaliya ee aayahayga, ugu dambeyntiina waxaa ii soo muuqday mustaqbalkaygii. Abaal ayay iga mudan yihiin dhamaan dadkii iga caawiyay jidka aan hayo ee isbeddalka.*

*"Sida aad aan soo xasuusto tani, waa sanadkaygii toddobaad ee aan xabsiga ku jiro. Waa gar in aan iraahdo in aanan waligey dareemin xornimada aan maanta dareemayo oo kale. Iskuma dayo in aan qariyo wixii isoo maray. Dhab ahaaantii, wixii isoo maray waxay i xasuusiyaa sida ay muhiimka u tahay in aan ogaado awoodda aan u leeyahay in aan gaari karo go'aano ii gaar ah. Anigoo eegaya isdhexgalka maalin kasta iyo shaqada nololeed, waxaan rajaynayaa in aan markhaati u noqdo qof ka xoroobay kooxaha gaangiska iyo hawlaha kooxaha gaangiska anigoo taasi maskaxdayda ka saaraya."*

⇒ Sang waa 24 jir isagoo xabsiga ku qaadanaya 12 ½-sanadood oo lagu xukumay isagoo ku jira Waaxda Asluubta ee Oregon ilaa iyo markuu ahaa 17 jirka. Waxay in xabsiga laga siidaayaa ku aadan tahay 2018-ka. Wakhtigiisa aad buu uga faa'idaystay isagoo qaatay Shahaado affar sano oo la xiriirta Dambiyada iyo Cadaalada Dambiyada isagoo xabsiga uu ku jiro kala hadlayay dhallinyarada khatarta ku sugan iyo dhallinyarada ku jirta xabsiga dhallinyarada. Wuxuu qorshaysanayaa in uu sii amba qaado waxbarasho dhanka sharciga la xiriirta iyo maamulka dadweynaha marka laga sii

daayo isagoo rajaynaya saameyn ku yeesho siyaasadaha la xiriira xuquuqda dhallinyarada iyo cadaalada dhallinyarada.

## Lucy ayaa tiri …

*Juun 2011-kii waxaa i toosiyay albaabkayga oo aad loo garaacayo. Garaacidii albaabka ayaan ka jawaabay, waxay ahaayeen wiilkii aan dhallay iyo gabar walaashay ah oo sheegayay in wiilkaygii kali ahaate ee aan dhallay la toogtay oo uu dhintay. Waan rumaysan waayay, in aanu wiilkaygii ahayn, ma ahayn xubin ka tirsan kooxaha gaangiska, sidoo kalena qofna ma dhibaatayn. Waxaan la hadlay saacaddo yar ka hor. Hadda uunbuu shaqada ka soo baxay isagoo ii sheegay in uu aadayay xafladda dhallashadii 21-aad ee adeerkii iyo in saddexdiisa carruur ahayd ay gurigiisa joogaan oo ay sugayaan inta uu ka soo laabanayo (isagoo go'aansaday in ay si joogta guriga u joogi doonaan). Ma fahmayo sida ay tani u dhacday. Ka dib waxaan aaday goobtii toogashadu ka dhacday wayna ii ogolaan waayeen in aan arko ilmahayga.*

*"Saddex sano ayaa laga joogaa wakhtigii la dilay wiilkayga, walina dadkii dilka geystay lalama xisaabtamin. Habbeen barka ayaan toosaa oo wali maqlaa garaacida albaabkayga siddii wax shalay dhacay oo kale. Waxaa jiray labba markhaati oo gaariga faanka la saarnaa wiilkayga markii ay dhabarka ka toogteen fulayaashu. Adeerkiina sidoo kale halkaasi uu joogay Waan garanaynaa magacyada labba qof ee dilka geystay ee ka mas'uulka ahaa dilkiisa, laakiin iyadoo la xiriirta fikraddan waalan ee jaajuusnimada iyo cabsi laga qabo waxa ay kooxaha gaangisku yeeli doonaan, qofna ma rabo in uu hadlo. Aniga laftayda ayaa wacay hooyooyinka labbadan markhaati waxayna ku adkaysteen diidmada ah in wiilashoodu ay halkaasi joogeen.*

*"Maxay ku qaadanaysaa in dadku rumaystaan in tani ahay tahay dhibaato AAN U WADA DHANAHAY, ee aanay ahayn mid ii gaar ah? Ma in ay ilmahaaga ku dhacdaa? Waligey ma filayn in wiilkayga la dilayo. Kooxaha gaangiska wax shaqo ah kumuu lahayn. Laakiin ka fakar waxa i qabsaday? In inagu filani way ina soo gaartay! Bulshooy, kaca! Waa in aan dib wax u barnaa dhallinyaradeena iyo nafteena ee u sheegnaa waxa jaajuusnimadu tahay. Jaajuusminadu maaha markaa aad aragto toogasho aan naxariis lahayn iyo in la dilo qof. Taasi waa qalad mana jiro wax cudur daar oo taasi loo yeeli karaa. Fadlan hadla waan soo ceshan karnaa bulshadeena inagoo ka dhigi karna mid ammaan ah. Aamusnaantu waa ta ina DILAYSA!!!"*

## Noah ayaa yiri …

*"Sanadahaygii u horreeyay dhallinyaronimo waan la soo dhibtooday hab-dhaqan ahaan iyo waxbarasho ahaan labbadoodaba. Si joogto ah ayaan dhibaato faraha ula galayay waxaanan markiiba ku dhacay koox qaldan. Kooxdan aan la dhaqmo ayaa ahayd koox gaangiska wadooyinka ah oo ka buuxay xaafaddayda. Waxaan dareemay aqbalaad aan ka helay kooxdan anigoo xubnaha da'ada weyn u arkayay kuwo lagu daydo. Muhiimadii aan dugsiga siinayay waxay noqotay mid luntay markii aan ku biiray anigoo ah 12 jir. Ku dhawaad shan sano, noloshaydii waxaa buuxiyay rabshado iyo hab-dhaqan naftayda burbur u soo jiiday. Waan ogaa in waxa aan samaynayo ahaa wax qalad ah, laakiin iima muuqan si aan uga bixi karo.*

*"Dadbaa ii yimiday oo isku dayayay in ay i tusaan kartidayda aan leeyahay. Waxaa la ii sheegay mustaqbalka wanaagsan ee aan yeelan karo, laakiin uma qaadan in hadaladaasi ahaayeen kuwo run ah. Dhagahaygu waxay noqdeen kuwo aan maqlaynin dhawaqa ku soo dhacaya, waxaanan sii waday ku sii socoshada jid aan meelna ii wadin. Dhibaatadii aan qabay waxay meel sare gaartay 2009-kii. Qoyskaygii ayaa kala tagay, waxaanan gudaha u sii galay noloshii kooxaha gaangiska, iyadoo aan isla markiiba bilaabay in aan dhibaatooyinka i haysatay ku qariyo isticmaalka aan u isticmaalo aalkolada iyo marijuana.*

*"Wakhtigan noloshayda ka midka ahaa waxaan dareemay rajo la'aan. Waxaan dareenkan ku cabiray caro ahaan. Waxaan rabay in aan ka aargoosto dadki dhaawaca i gaarsiiyay. Waxkasta waan ka daalay, waan ka daalay nolosha. Wax hada ka dib macno ii lahaa ma jirin. Isla sanadkaa waxaan ku dambeeyay in galo dambiyo halis ah. Waxaa la i dhacay wakhti la kala gadanayay mukhaadaraad waxaanan raadshay aargoosi. Isla habeenkaa ayaan isa soo dhiibay. Waxaan ka daalay ka cararkii aan ka cararayaay dhibaatooyinkayga waxaanan diyaar u ahaa wixii cawaaqib ah ee taasi ka yimaada. Waxaa la geeyay xabsiga lagu hayo dhallinyarada ee Portland. Waxayna ahayd markii u horraysay ee aan xabsi galo. Waligay sidaan oo kale kelinimo uma dareemin. Anigo dhex fadhiya qolkii aan ku jiray waxaan gaaray go'aan ay ahayd in aan marka hore gaaro. Waxaan*

*go'aansaday in aan ka tego noloshaha kooxaha gaangiska ee aan soo maray.*

*"Go'aankani wuxuu ahaa mid ka mid go'aankii ugu adkaa uguna sahlanaa ee aan waligay gaaro. Wuu sahlanaa sababtoo ah waxaan karhay dhacdadan aan kala joogsiga lahayn iyo dhibaatada ay keentay. Aad bay u adkayd sababtoo ah waxay ahayd sida aan naftayda u arkayay. Kooxda aan bulsho ahaan ka tiirsanaa dhamaantood way ka tirsanaayeen, haddii aan ka tagi lahaa waxaan wajihi lahaa cawaaqib xumo i soo gaarta sida in la i garaaco iyo in la faquuqo. Waxaan doortay nolol.*

*"Markaan jiray toddoba iyo tobban jir waxaa la igu xukumay 7 ½ sanadood iyadoo la raacayo Xeerka 11 ee Oregon. Waxaan dareemay lalabo, laakiin waxaan diyaar u ahaa isbeddel aan sameeyo iyo in aan muddadaan xabsiga ku jiro ii noqoto khibrad ii soo kororta. Nasiib wanaag waxaan awooday in aan imaado xarunta dhaqan-calinta ee lagu hayo dhallinyarada oo ay ka jireen fursaddo badani.*

*"Intii aan ku jiray wakhtigii la igu xukumay waxaan helay hab aan dib ugu laabto waxbarashadii, waxaanan xaqiiqsaday in maskax fiicnida aan lahaa aan ka faa'iidaysto. Xirfaddaha aan isticmaalay markii aan gadayay mukhaadaraadka in loo isticmaali karayay abuurida ganacsi. Haybada aan u leeyahay shaqaalaynta waxaa loo istimaali karayay abaabulka bulshada. Jacaylka aan jeclahay wax akhriska waxaa loo isticmaali karayay buugaag laga buuxiyo macluumaad cusub oo la xiriira dunida, oo ku saabsan nolosha.*

*"Waxaan dugsiga sare kaga qalin jabiyay darajada 3.5 GPA iyo anigoo isla markii aan qalin jabiyayba isqoray jaamacad. Ka dib markii aan markale darajada 3.5 GPA ka keenay Lane Community College waxaan awooday in aan u wareego OSU si aan u sii amba qaado Shahaadadayda affarta sano ee Horumarinta Aadanaha iyo Joogtaynta. Waxaa la igu manaystay wanaag la i faro iyo dad talo la isiiyo oo iga caawiyay in ay ii hagaan jid cusub. Abaal ayaan u qabaa iyaga iyo naftaydaba in aa gaaro heerka kartida aan leeyahay ee waligayba aan lahaa."*

## Brenda ayaa tiri …

*"Goorma ayay joogsan doonaan? Dilka, mindiyaha la is galinayo, iyo ixtiraam daradu ? Kuwaani waa carruur midba midkooda kale dilayo iyo wax kast oo ka horyimaada. Wiilkayga waxaa loo toogtay sidii xayawaanka oo kale iyo looga tegay in uu ku dhex dhinto gaariga. Waa maxay sababta ay tani u dhacday? Maanta oo ku beegan 15 sano ka hor tii dhacday walina aan jawaab la haynin, dadkii dilka geystay aanay ku jirin (XABSI) taasi oo la xiriirta dambiga ay galeen. Kaliya aniga iima keenin xanuun aan loo adkaysan karin ee laakiin waxay u keeneen walaashiis, gabdhihii uu dhallay, iyo wiilkii uu dhallay. Tani waa mid aan ku noolnahay maalin kasta. Wax nabad ah oo noo jirtaa ma jirto, gaar ahaan carruurta uu dhallay, oo koraya iyagoo aan aabo lahayn. Wuxuu ahaa aabe qaali ah, walaalo la jecel yahay iyo wiil la dhallay. Waan ogahay in dadka qaarkiis ay la tahay in ay masiibadani wakhti hore dhacday, laakiin aniga (oo hooyadiis ah) waxay ila tahay siddii wax shalay dhacay oo kale. Hooyo waligeed ilmaheeda ma ilowdo.*

*"Wali waxaan xasuustaa booliska oo shaqada aan ka shaqaynaya iigu yimid iyadoo sida warkan xun. Waxay ii ahayd sidii qof wadnaha igala baxay oo kale. Waxaan xasuusta aniga oo dhulka ku dhacaaya oo ku qayliyana Ilaahoow ii gargaar. Waad aragtaa, in aan hadda uun duugay/aasay inantii aan dhallay ee cudurka kansar u dhimatay 10 bilood ka hor intii aanay tani dhicin. Way igu adag tahay la kulanka iyo aaminaada dadka cusub, anigoona ogayn in ay xiriir la leeyihiin qofkii ama dadkii dilay ilmahayga. Waxaan ahay hooyo dhashay affar carruur ah oo saddex ka mid ah geeriyoodeen; Sidoo kale waxaan lumiyay wiil ay da'diisu ahayd 14 jir oo biyo ku haftay.*

*"Culays badan ayaa saaran wadnahayga, ogaansho la'aanta aanan ogayn in waligood la qaban doono iyo goorta la qaban dadkii dilka u geystay wiilkayga waxay xanuunka i haya ka sii dhigtaa mid aad u daran. Carruurta dilaysa carruuraha kale waa in ay joogsataa! Marka qoriga la rido ee xabaddu ka baxdo toora tooraha, waxay dhahdaa waa dhamaadtii."*

## Stephen ayaa yiri …

*"Waxay noqonaysaa doqoniimo haddii aanan qirin saameynta ay kooxaha gaangisku ku yeesheen aniga, qoyskayga, iyo guud ahaan bulshada. 22-ka*

*sano ee aan jiro waxaan haystay wakhti aan dib u eego wixii i soo maray iyadoo dib u eegidani aan ku ogaaday sida noloshaha kooxaha gaangisku iyo hawlaha la xiriiraa ay sida xun ugu saameeyeen jiil dhan oo jira oo ah dhallinyaro, iyadoo keenaysa jiil dhan oo dhalliyaro ah oo dambi galaya. Waxaan hada ahay qof u dooda yaraynta rabshadaha kooxaha gaangiska iyadoo la xiriirta dhaawac ay keeni karto iyo saameyn ballaaran oo ay yeelan karto kaasi oo wada gaari kara bulshada. Habka kaliya ee aan garanayo sida loo sameeyo tani waa in aan sheekadayda dadka la wadaago—sheekadaydka ka hadlaysa sida kooxda gaangisku uga qayb-qaadatay beddelka noloshayda. Tani waa macnaha ay ii lahayd kooxda gaangisku.*

*"Waxaan ahaa ilmo la korsanayay. Waxaan daryeelka ilmo korsiga bilaabay anigoo ah lix jir, oo hooyaday iyo walaashay ka tagay, oo ka tagay Waqooyi-bari Portland iyo ceebtii foosha xumayd ee ay taasi wadatay—taasi oo ahayd sidaan wax u arkayay. U guuriddii aan u guuray Koonfur-bari Portland wuxuu anigoo wiil dhallinyaro ah ahaa ii ahaa nidaam kala guur ah oo adag, laakiin waxay ahayd kala dhaqaaq oo aniga iyo qoyskaygii naga dhex dhacay. Waxaad aragtaa, in ragga ka tirsan qoyskaygu waxay ku dhex xayirmeen xiriirka ay la leeyihiin kooxaha gaangiska, iyadoo haddii aan joogi lahaa degaankaasi ana aan si fudud ugu dhex xayirmi lahaa. Halkii aan taasi ka samayn lahaa waan iska fogeeyay, muddo sanado kooxda gaangisku xataa maskaxdaydaba kuma soo dhicin iyadoo sababtu tahay anigoon ka ag dhawayn.*

*"Waxyaalaha markasta ku, dhaca, 97% oo ka mid ah carruurta la korsanayo waa dareen kelinimo. Haa, dareenkan kelinimo anigana wuu igu dhacay, waxaanan rabay in aan helo qof aan ku xirnaado. Isku xirnaanta dadku waa mid daruuri ah, waana wax aan la rumaysan karin jidka dheer ee ay dadku u maraan si taasi u helaan. Nasiib wanaag la iigama baahan in aan sameeyo wax caadinimada ka baxsan si aan ugu lug lahaado kooxda gaangiska. Kaliya waxay ahayd in aan aqbalo kooxaha gaangiska—oo aan iraahdo waan aqbalay oo waan rabaa, iyadoo taasi ahayd sida ragga ka tirsan qoyskaygu yeeleen. Anigoo rabay ku xirnaanshahaasi aan ku xirnaanayo qoyskayga oo ahaa mid aanan waligey helin sababtoo ah cawaaqib xumadii ka dhalatay (ama wanaagii) guriga ilmaha lagu koriyo ee aan ku jiray, waxaan doortay hab aan ugu xirmi karayay qoyskayga, iyo wakhtiga aan ku xirmi kararay.*

*"In aan iraahdo nolosha kooxaha gaangiska wuxuu ahaa go'aan iyo isbeddel sahlan oo aan isla habbeen ku gaaray wuxuu noqonayaa been sheegid. Runtii, wuxuu ahaa hab gaabis ah sidoo kalena dheer sababtoo ah waxaan ahaa wiil yar oo isku dayayay in uu go'aansado nin caynkee ayaan noqon doonaa. Dugsigii dhexe wuxuu ahaa markii uu isbeddelku bilaabmay. Waxaan bilaabay in aan si aad ah u xirto midabka guduudka ah si aan ula qabsado. Wax qosol leh ayay ahayd sababtoo ah midabka aan jecelahay waa buluuga. Waligay ma qiran, laakiin waan ka xumaa in aanan hada ka dib midabkaasi xiran karaynin (ama inta badan sidii hore u xiran karaynin) si uu midabkaasi guduudani u tilmaamo isbahaysigii aan ka tirsanaa. Midabka guduudka ahi wuxuu noqday tallaabadii u horreysay ee diidmada cad ku muujinayay iyadoo hooyadaydii i korsanaysay, oo ahayd hooyo Kiristaan ah oo wanaagsan ay bilowday in ay taasi dareento oo ay markasta igala hadasho.*

*"Degaanka Koonfur-bari ee aan ku noolaa ma lahayn rabshado u dhexeeyay kooxaha gaangiska ah ee madow. Waxay ahayd degaan ay inta badan iska leeyihiin kooxaha gaangiska ah ee Mexican-ku, sidaa darteed in muddo ah colaadda in aan dhan 'la saftaa' wax raad ah iguma yeelan. Wuxuu ahaa wax la ii qurxiyay iyo caasinimo, sida dhamaan muusikada aan dhagaysanayay ee sii xoojiyay kooxaha gaangiska iyo dambiyada oo aan u arkaayay wax bulsho ahaan dadku ogol yihiin oo caadi ah. Dhibaatooyin intii hore ka badan ayaa ka dhacday guriga marka loo eego Koonfur-bari Portland ee la xiriiray arrimaha kooxaha gaangiska, taasi oo ugu dambayn ii horseeday in hooyadii i korsanaysay ay guriga iga cayriso (gurigaasi oo ahaa guri wanaagsan) iyadoo sababtu ahayd iyadoo 'i joojin' kari wayday ama tallaabooyinka aan qaadayay ama sida aan u dhaqmayay.*

*"Taasi may dhicin ilaa intii aan ka gaarayay dugsiga sare in aan runtii bilaabay in aan kooxaha gaangiska si guud u arko waxay ahaayeen. Hubku marnaba uma arkayn wax loo baahan ilaa hada mooyee, markii aan ogaaday in dadka uu dhaawac hada soo gaarayo. Waxaan samayn jiray dagaal gacan ka hadal ah waanan ku raaxaysan jiray mararka qaarkood, laakiin markaan arkay kooxaha gaangiska oo istooganaya dareenkaygii dhanka ammaanku wuxuu si ku meel gaar ah iskugu beddelay naxdin. Maan rabin in aan ku dhaawacmo wax aanan fahamsanayn ama ku dhinto ka hor intaanan arag noloshu waxa ay tahay sidoo kalena aan wax*

*aaminin. Naxdintani si dhakhso ah ayay isku beddeshay markii aan gatay qorigaygii u horreeyay. Waxaan dareemay dareen illaalin, dareen nabad gelyo, iyo dareen awood yeelasho oo aanan hore u dareemin. Laga bilaabo dadka aan garanayay ee dhintay, ilaa laga gaarayo kuwo badan oo ka mid ah xubnaha iska soo horjeeda ee kooxaha gaangiska ka tirsan, ugu dambayn waxaan go'aansaday wixii aan hayayba in aan u hibeeyo'banging shit' oo aan oofiyo shaqadii'qoyskayga.' Nasiib wanaag iyo nasiib daraba, waxyar ka dib markii aan go'aankan weyn gaaray ee runtii dilkayga sababi lahayd, waxaan geystay dhac waxaana la igu xukumay 7 ½ sanadood oo xabsi ah. Waxaan aaminsanahay in xukunkani uu badbaadiyay noloshaydii marka ay noqoto noloshaha kooxaha gaangiska sababtoo ah waan ogaa in aay gaaray go'aan qaldan oo aanan ii horseedaynin wax mustaqbalka. Si kastaba ha ahaatee, bilowgii maan rumaysnayn in xukunka la igu xukumay uu ahaa barako qarsoon. Sidoo kale 'xiriirkii'aan la lahaa kooxahayga gaangisku ma noqon mid qarsooma. Waxaan xabsiga kula kulmay xubno ka tirsan kooxaha gaangiska oo dheeraad ah, dhowrkii sanadood ee u horreeyay waxa ay ii ahaayeen kuwo tijaabo ah oo ah yaa awood badan, qofkee gaangis ayaa ah mid daran, dagaalo, cabsi gelin iyo badbaado dhanka niyada ah. Waxaan magac iskugu yeelay kooxda gaangiska ee loo yaqaan "Bloods" waxayna igu qaadatay sanado badan in aan iska mayro ceebta.*

*"Dadaal badan ayaa keena in la iska fogeeyo nolosha gaangiska, laakiin xusuusta joogtada ah ee dadka dagaalamayay, ka qayb-qaadashada, iyo iyadoo aan maskax ahaan la korraynin (oo ah qaybta ugu daran) ayaa ahaa waxa aan adeegsaday si aan uga tago. Waxaan ogaaday waxa aan rabay oo ahaa in aan wax noqdo nolosha sidoo kalena waxaan rabay in aan wax kale la imaado, anigoo ogaa in noloshaasi kooxaha gaangisku ay tahay mid waligeed dib ii dhigaysa oo ay iga horjoogsanayso waxyaalaha ii bannaan mustaqbalka. Tani waa sababta aan u go'aansaday in aan sii amba qaado nolol kale, iyadoo ay sabab u ahayd dilalka iyo xunuunka aan sanadaha badan ka arkaayay wararka ee ka dhashay rabshadaha kooxaha gaangiska. Hada ka dib ma rabin in aan qayb ka ahaado sidaa darteed, waan iskaga tagay.*

*"Inkastoo aan oran karo waxyaalaha aan kala soo kulmay kooxda gaangisku waa wax xun oo dhaawac keeni kara, been baan sheegayaa haddii aanan oran waxa aan ka faa'iday ma jirto. Kooxaha nolosha gaangiska iska baxay waxay leeyihiin dhowr xirfaddood iyo dabeecaddood oo si wanaagsan loogu isticmaali karo nolol maalmeedka ama degaannada shaqo. Xirfaddaha sida daacad ahaanta, abaabulka, wada shaqaynta, shaqada adag, iyo adkaysiga waxaa lagu aqoonsan karaa doorka ay nolosha kooxaha gaangisku igu lahayd. Waxaan xirfaddahan hada u isticmaali karaa noloshayda iyo shaqadayda iyo isku dayga aan isku dayayo in ay dhallinyarada noqdaan kuwo aan qaadan go'aankii aan hore u qaaday oo kale. Taasi waa macnaha ay ii lahayd kooxda gaangisku."*